

21

Uru

Wawo

Wawo, S I G A D

Wawo (IYO SHEEKOOYIN KALE)

Wawo

Wawo

GAMUUTE AXMED GAMUUTE

Wawo

Wawo

- Dr.

- Gura

- Bala

- Ahmed

- Adnan

- Cali

- Fu'ad

Kana tegile

Iyo walasany

ayaa ugu hayaa.

MAHAD-NAQ:-

Uruuriskan niska yari, Maxamed Ibraahim Warsame, la'aanti: tisqaad muu noqdeen. Waayo, qoraalba anigoo ka loox-tuuray, oo aannu toddoba sanadood iyo dheeri deyro kala ahayn, ayuu HADRAAWI inaan qalin iyo warqad dib isugu qaado, ii suurta geliyay.

Sidaa awgeed, Maxamed Ibraahim baan abaal waafiya uga celinayaa.

Waxaa kale, oo aan talo, gacan, iyo dhiir-gelintii ay ii fidiyeen uga mahad-naqayaa:-

- Dr. Yuusuf Axmed Cali
- Cumar Salaad Cilmi
- RaShiid Shiikh Cabdilaahi
- Axmed Cabbaas Axmed
- Aadan Xaaji Nuur (Khabaas)
- Cali Jaamac Basaale (Guush)
- Fu'aad Cabdul-Gasiis

Kama tegine, xaa-kayga Faadumo Xaaji Cumar iyo walaashay Ubax Xaaji Cumar-na, libin gaara ayaan ugu hayaa.

XUSUUS:-

MAXAMUUD XAAJI XASAN (HURE)

IBRAAHIM FAARAX DAWAARRE (GUREY)

MAXAMED AXMED MAXAMUUD (ISLA-WEYN) iyo  
geesiyaashii kale, ee Qaddiyadda Wadaniga ah,  
u shahiiday baan xushmad iyo xusuus uga dhigay.

Tasmada :-

1. SOO HAABO

2. TAAH

*lament*

3. SIGAD

*perun jelo*

*(maamulka waana siya  
opli perun jelo waana  
siya)*

4. QABYO

*incompleto*

5. DHEGA DAMEER

*was dameer iyo Codka: dhexood  
ka iyo was upuski (ie siyaad iyo ~~siya~~ Ali  
Nolad' ama Ali Nolad' iyo Codka)*



S O O    H A A B O

Maya. Agaali waran maaha. Waa gunti dhiig.  
Dhawaaq dhawr iyo cawa-daran weeye. Xidid-  
madowna aad buu u daalanaa. Sare-joogga  
ayuu ku ciirayey. Intayse hiimsa-hiimsaha  
ahayd buu Mujaahidiinta ku soo wareegay.  
Meesheeduu raxan walba ugu tegey. Dareen bay  
ahaayeen. Aad baa laysu bartay. Aqooni isugumay  
dhinayn. War la sheegaana iskumuu seeganayn.  
Dagaalkaa walaaleeyey. Waa la wada Jabhadeeyey.

Ay saas tahay, wuxuu qoonsado iyo shay  
qudha oo uu ka biya diido, Xidid-madow lamuu  
kodlan. Cilcilowgiiba xera-guusha xudunteedii  
buu ku soo laabmay. Gabal yar oo bannaan ayuu  
eegtay. Qodexdii buu ka sugay. Geed gaaban oo  
gonboshe ah ayuu madaxana ku toosiyey. Dhinacuu  
dhigay. Dhulkuu gogleday. Kabuhuu barkaday.  
Dhammihi uu lanbarkiisu ahaa, 279 ayuu  
bogga gashaday. Isaguu weheshaday.

Hurdaduna indhahay ka saarrayd. Wuu hamaa-  
nsanayey. Hammi baase uga soo hor-maray.  
Fartiyo boogtaa is oge, nabarkii ku mudnaa  
baa ku soo kacay. Waa lagu yaacay.

Sida ugaxda goray, halkii ugu gaarreenaa,  
 ayaa ku soo aaray. Wuu ku oogsaday. Laama-  
 dood buu uga dhaartay. Dhinacaa ciidda u  
 qaban waayey. Kashiisuu la sheekaystay.  
 Salaankuu Ina Walanwal<sup>1</sup> farta ku goday, ayuu  
 ka halabsaday. Waayaha jooguu ka anbaqaaday.  
 Xaggan iyo xaggaaba wuu ka eegay. Mashqacuu  
 ku daydayey. Hoos buu ugu degay. Wuu rog-  
 rogay. Shalay iyo hawlaheedii buu dib u  
 jeedaaliyey. Tagtadii buu wax weydiiyey.  
 Wuu ka taamila qaatay. Timaadadana, hilaaduu  
 ku qooraansaday. Ishuu la sii raacay. Dhul  
 fog buu gacan togaaleeyey. Dibadyaal<sup>2</sup> buu  
 la doonyeystay. Hawraar xusbad leh buu ka  
 guntay. Garabkana, Barabaraaluu<sup>3</sup> ka cuskaday.  
 Wuu ku hal-qabsaday.

"Adigiyo baxnaanadu  
 igu bayda furatee....." Ayuu afar,  
 laba, iyo lix jeerba ku reemay. Carrabkuu  
 ku adkeeyey. Ninba meesha buktaa, isagay  
 balbasha<sup>4</sup>, niyad buu ugu celceliyey. Si weyn  
 buu ugu hakaday. Sababtana wuu is weydiiyey.

- 
1. Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi).
  2. Waa maanso uu leeyahay Hadraawi
  3. Waa la mid.

Su'aaliba, su'aal bay u sii dhiibtay. Lugoo-  
yo adduun baa ka gaadhay. Wuu ku har<sup>2</sup>aday.

reydabkaan —

"Ma reydabkaan,

reydabkii ahayn!

Maanigaa raq aho,

riiq gaboon

roori hayn!

Ma rimaygu ka soo dhacdi

yaan run sheegi hayn!" Waraabihii

ku.....halaan-halayey baa hortiisa yimi.

Weel baasku halkuu biyaha ka habayaa, ka

gedmatay? Maansaar bay ka liqday. Way u

caad-bixi weydey.

Kamuuse inaabsan. Wuu isku hawlay. Ishii

buu aad u goobay. Raadkuu sii guray. Ooman-

tiisii buu raadceeyey. Wuu ku joogsaday.

Dib buu ugu soo arooray. Hirba, hir buu u

gudbiyey. Kamuu hadhin. Felagey ula gashay.

Isaguna kamuu soo maagin. Wuu haybsaday.

Mooreeye, duqii ahaa baa afka u soo yubay.

Dhegtuu u hooriyey:

"Dayaxii galshuu degey. Dirir baa la

xera galay. Waayadanba awrku, wuu afku-

rubadlaynayey. Ma joogaan laxihii.

Waa horay cirka, galbaad uga arooreen.  
 Afagaalla waxba kamay danbayn. La kal bay  
 ahaayeen. Yabaqoodaa isu baxayey....."

Fiid-cawl caweera leh bayse ahayd kolkuu  
 Xidid-madow wiiga dhigay. Eeggana waa caweysin  
 danbe. Dabayshaa baf-le. Galowgaa foodhyaya.  
 Dhirtaa guuxaysa. Guumaystaa uubataynaysa.  
 Aar-goonlaa kolba 'cuuc' leh. Dacawaa mash-  
 xaradaysa. Ilili-deedaa baxaysa. Wax bay  
 ogtahay.<sup>4</sup> Iyadaa yeelkii, reerka geeddiga  
 hadal-haya, uga war roon. "Shaamareeroo...  
 Shidda badaneey...Shib lagaa sii!" Maskii  
 waa sheekh la yidhi baa Dayo Faarax, ku  
 habaaraya. Kama qasna dhurwaagii. Walli  
 Alluu washiiriyayaa. Way u ahaatay. Baal  
 baa ka taagan. Wuu faxaaxsaday. "Haakah!"  
 buu yidhi. Dhiishii fakhriga tuur. Daacuu  
 la goodlaynayaa. Qosol buu dhikhleeyahay.  
 Shimbir baa,

"Ido waa daawo  
 naagow diiday!  
 Dani waa seeto  
 Kibir baa diiday!  
 Nabadi waa doore  
 gardarraa diiday!" ku doodaya.

Samadana, hadba xiddig, godkiisii ka tar-  
aaray baa iska soo qayraaminaya. "In shar-  
le iyo shaydaan-ku-dhac" baa daafta laga  
leeyahay.

Sidii buu Xidid-madowna u il-galacalaynayaa.  
Waayaalihii baa ku godlan. Isna weli, dheg  
-tuu ku maalayaa:

"Moorada min-guurinteedu, asalkaba,  
makhluuqa innagu xeeran dhaqdhaqaaqiisa  
iyo is-bedelka ku yimaada ama ka yimaada,  
ayey ku qe'tontaa. Waa sida, oo in fiira  
dheeraada loo yeesho weeye. Balse hadda, aynu  
khamiistii maanta ahayd, khayrkeeda Alle  
hayna siiyee, iyo duhurkii, duhur inoogu  
raad danbeeyey dib u yarahe jaleecno."

" Hadhkiisu kolkuu gadiitay, ina gee.  
Cirku wuu cusbaa. Fool sidkeed go'ay, bay  
cimiladu u saan-saan ekayd. Qoraxdu naer bay  
ahayd. Way qaxmaysay. Mici bay lahayd. Dhuxu  
-lay, saydhinaysay. Way soo cabtay. Soohdin-  
teediina way ka soo dhawaatay. Kaabigay inoo  
timi. Ciiduna raran bay ahayd. Waa lagu caga  
gubyoonaayey. Samadana siigadii irmaanayn

jirtay baa ku tolayd. Tagoogo orgi bay  
lahayd.

"Xuuri, duuri weeyoo  
waa xiita, xiitoo  
xeegaysi weeyee  
xooraye, ma xoorteen?  
Xidhan oo xayaayiran  
xakab jabayna weeyoo  
kani wuu xiijaabtee

xooraye, ma xoorteen?" Ayey ku wil-  
wiloonaaysay. Haadaa dhex dabaalanaysay. Galo-  
-wgaa la boodayey. Intuu bealasha isla dhaco  
oo uu 'ili ili' ku abraaro, garba-dhiigna ku  
soo caano-shubto, ayuu bar-beriiq ku soo  
caga-dhiganayey.

"Xogogaal u daa qudhaanjada. Siri-daari  
weeyaan. Soongurkaa wax u sheegay. Fadhaan-  
fadhkaa u akiday. Xuubka caaradana way ka  
xaqiiqsatay. Salkay ka ruqday. Geeddi baa  
galay. Godan oo dhan way ka urursatay.  
Geedaha waaweyn jiridooday kor u fanatay.  
Masaduna way soo daba martay. Hoos bay u  
soo degtay. Waa aroor. Kalkeedii weeye. Way  
soo horratay. Dhudhun iyo in ku siman bay  
dhulka u soo joogsatay. Darka iyo dhibicda

ugu horaysa inaan looga dheerayn bay kar-  
kaarka u soo yuurursatay.

" Galoolkuna dhirtii kalo wuu ka mudhay.  
Gawskiisuu ka cabay. Wuu magoolay. Man iyo  
fuf dhaayaha u roon buu ku hagoogtay. Kaydkii  
u sheela~~ga~~ buu la soo baxay. Inta geelu guun-  
yada kale dheer yahay, isna inuu geedaha  
dheer yahay ayuu muujiyey. Xareer ayuu  
butaystay. In lays biyo-dhiijiyo ayuu u soo  
qoor-diitay. Mulaax buu sheegtay."

" Jiilaalla<sup>2</sup>biya-raray. Ibadii boqol waa  
horuu ka soo baxay. In dhaweydba is-yeel-  
yeelkii baynu la gudhinaynay. Cimri lagu  
yeeshoodaana haatan uma hadhin. Cadceed casar  
gaaban joogta ayuu la meeqaan yahay. Deynka  
ku go'ay baase ku walba ka culus. Waa diyo.  
Rag dhiiggii weeyaan. Inta<sup>san</sup> iyo agoon baa  
ku leh. Duugoobi mayso. Tabniga qaaxada  
weeye. Way ku maqan tahay."

iude sau iyo  
agoon too  
inta san iyo

Habeenkuse weli wuu isku jiraa. Cirku ma  
dedna. Daruur iyo caad midna kuma daboola.  
Xiddiggii Woqooyina helkiisii buu samada ka  
sudhan yahay. Muu guurin. Waa heego joog.



Wuu shidan yahay. Tiriig la soo deldelay  
 baa la mooddaa. Qiblada beegeeda ayuu qun  
 uga hilaacayaa. Waa jiheeye felekiya. Hal-  
 toddobeadyaduna isay bidhaansadaan. Way ku  
 gudaan. Intay geeddiga yihiinba madaxoodu  
 kol qudha kama baydho. Had iyo jeer waa  
 qumaatigiisa. Xariiq toosan bay la haystaan.  
<sup>Sheegday</sup>  
 Sheeday ka eegtaan.

Figta uu xiddigga woqooyi ka nuurayo  
 mooyee, dhigta faygeeda kalena Wadaamo-  
 xoorihii baa yuurura. Koonfur bay loolka  
 kaga xaraysan yihiin. Deriqse aan laalaab  
 lahayn baa labedooda isku xidha. Taar bay  
 isla haysan jireen.

Milayganse Nin-la-gigaygii hashii Nebi  
 Saalax gawracay baa dawgii xidhiidminayey  
 ku gudban. Wuu kala dhex galay. Habaar-  
 qabuhu gidaarkii Shiinaha ee la sheegayey  
 buu ku noqday. Wuu kala qariyey. War isuma  
 hayaan. Ooduu u kala rogay. Wuu ka saalax-  
 weeteeyey.

Xidid-madowse heegaduu weli ku laallan  
 yahay. Burcadii lebiga haadde sii rogiisa  
 ahayd, ee geedkii dhiLOWYAHANKU barriinsaday



ka soo faana horraysay, ayuu laba-legdoona-  
yaa. Wuu isla meqan yahay. Xidaarkii guunka  
ahaa buu sidii "weeye-weeyada" u hayaa:

"Sanadkoo Isniin gale, kala-guurka oo  
aan wansiixin, iyo Waabariis oo toomentaa,  
gu' samaada oo seer-ma-weeye noqda ayey  
horseed u yihiin. Wada-hadalbase haad baa  
ka hadhay. Mid qudha weeye. Laba u la'.  
Kelidii buu moorada salkeeda guntan-yahay.  
Waa guri-danbays. Labada Naaf cirirkii  
saddexeeyey ee Rajalaha toddobada ku nuug-  
ay is-kaba raacintiisuna isagay ku go'daa.  
Galowgiyo halkae uu ka nugul yahay ayuu  
kaga dhow-yahay. Hadduu hinqado, ximruu ugu  
quus goynayaa. Qabqabluu ku halgaadayaa.  
Legama kaco. Waa min-khatinkii. Ebyanaa la  
yidhaah. Waqalkaa woqooyi baa ku mateenoo-  
baya. Dal dhammeeye iyo mahiigaan jimicsa-  
day ayuu ku noqonayaa. Hoohad oo koonfur  
inagagga dhufata ayaa loo saaran yahay.  
Dabayluhuna kala sheegane iyadiyo dab-  
cuunkii ayuun buu ku baxaa. Kolkay soo  
dhaado ayuu shin-ku-dhalad noqonayaa. Cirkuma  
koonfur buu ka jibaadayaa. Waa loo wan-  
qalayaa. Jeerkaasaa feleg meerayaa!"



Waa hiimamow. Xidid-madowna il iyo beal  
ismuu saarin. Hurdo dhakow kamuu siin. Wuu  
ka soomay. Ay saas tahay, haddana caadadii-  
sii muu baajin. Hadduu geed iyo ruux kala  
gartay ayuu ka oogsaday. Intuu waagu soo  
cadaanayana muu sugin. Wuu ka hor tegey.  
Gaadhka u danbeeya ee barta hoggaamintana  
Keyse Waayeel baa lahaa. Xaggiisii buu u  
soo dhaqaaqay.

"Soo haabo soo haabo  
ha beenaane soo haabo,  
heeryada an tuuree  
hooxad Koonfureedeey  
soo haabo soo haabo  
ha beenaane soo haabo.  
Aan haad-ka-roorkiyo  
baqayaha halgaadnee  
soo haabo soo haabo  
ha beenaane soo haabo.  
Hogol gaaxsanayday  
hiilkaan sugaayaay  
soo haabo soo haabo  
ha beenaane soo haabo.  
Hebel iyo hadhaagii  
aan kala hegaagnee

Dhi soo haabo soo haabo  
 ha beenaane soo haabo  
 "soo haabo soo haabo." Ayuu Xidid-  
 madow hoos ugu guuxayey.

1989

T A A H

- - - -

Dhidid waaweyn ood finan mooddaa ka soo cagaaray. Masar laab qoyanuu la soo baxay. Sidaa iyo sidaa intuu wejiga ugu duugey buu "Allaylehe tus baa jira" ku reemay.

"Kaaga marag", iyo ugu guux habeenkuna:  
"Saawesaawiyo sidii la arki jiray weeye.  
Waa huur. Hawadaa taagan. Naqaska dadka ku dhegen. Cimilada candhadeedu waa dhays.  
Gondahay xaabaysaa. Cirkuna jiq weeye.  
Gabbal yari kama bannaana. Daruur madow baa ku godfan. Fool uurku haamoobay oo sidkeed go'ay oo 'xaggeen dhiggaa!' 'Xaggeen dhiggaa!' ku hiraan-hiraysa ayuu la meekhaan yahay. Godol baa cudhay. Curashuu u gaalgaashay.

"Agagaarkiyo  
haddaan araraha  
ku irmaanaa  
aaba, aabaha  
aabayaashaba  
aabahood iyo  
unda weynee

aaka, aakuhu  
 ku aroostaa  
 lay ishaaroon  
 eegga hooyaa," inuu ku jibaado oo  
 Alla wuxuu ka qaybshaba, ay isagiyo dhulku  
 mar is qabsadaan ayuu la hagoogan yahay.  
 Gooray noqonse ma aqaan...ma aqaan...ma  
 aqaan..."

Sigadna waa hoyaatin. Keligii buu dhudhun  
 -hore dhudhun-danbeedinayaa. Kor iyo xaggii  
 gurigiisuu wadadda u gurayaa. Farda-jaan  
 oo aaran iyo dhalaalkii Jabeen u badan iyo  
 lug teel-teel ahba waa lagu weydaaranayaa.  
 Mase oga isagu. Hoos buu u fooraraa. Goroduu  
 lalminayaa. Dhulkuu la faqayaa. Kashuu ka  
 dunuunucayaa. Wuu kala qaaran yahay. Xaadir  
 maaha maankiisu. Meel kaluu la haystaa.  
 Carro guduuddii iyo gurigii saaxiibkii ayuu  
 xusuusta ku joogaa. Gondahana Guuleed yaraa  
 kaga maran.

## II

Waa casar gaaban. Budulkay cadceeddu ku  
 sii taagan tahay. Galbeed bay cirka uga

tubatay. Waa caraabe. Way xuslinaysaa. Kub-ku-siigaaleey weeyaan. Salaasa cawlan, fasa-qantay, hun ah oo ka yaraatay, ayey ku marr-iiman tahay. Tafahay sii haysataa. Iyadiyo godkeeda inaan habeen kala dhex qaadin ayaa u go'an. Way taabacaysaa.

Saloognaantay ku salaqsanaysaa, oo xaydh riyadii shalmada u ahayd ee uu wakhtigu iligta shaandhada kaga dhigay, ma hagoogna. Dusheedana wilan mayso. Dabayl bea kala hadhay. Mejaa iyo woqooyi qumman bay kula sii jeedaa.

Sigad bay isku lug yihiin. Wuuse ka xog la'yahay. Daaftuu tooraynayaa. Udubkuu xaas-kiyo maxastii saaxiibkii ku ogea ayuu tiigsa-nayaa. Xil bea gubaya. Eeri dhaban ayuu la mitaal yahay. Sideedii ayuu u alwanayaa.

Badhtankana Qun-yar-degadii buu ka dhanbalayaa. Ciid caskeedii bay isku jirean. raafkuu ku qodayaa.

Xoonsan

Noloshuna gajeelay hareerihisa baaxaa-  
degeysaa. Si weyn baa macdaarkii Beesad-kala  
-jeex loogu Xoonsan yahay. Xaawalaydiyo  
kuraygii xaafadaa ku dhan. Waa laysugu  
dhacay. "Iga baydh" iyo "hayderderintaa" ka  
yeedhaysa. Meel loo kala maraa la la'yahay.  
Tiinkii sonkor-nabaada ahaase soo ma dhawaan.  
Jeer horaa lagu leefay.

Wiil iyo aabihii baa halken heet-heeti-  
naya. Daraan biya ah bay waldaaminayaan. Meyd  
inay sidaan baa la mooddaa. "Waa bar subagee,  
yaanay biliq odhan", ayuu odaygu intaa ku  
halaan-halayaa.

Halkeerra Batuuladii 'hanuunintaa'  
hadaafaysa. Shanankii guduudnaa iyo googa-  
radii Balcaadu ahayd bay ku gaadhen tahay.  
Guul-wadayaal baa gelbinaya. Durbaankeedii  
bay kaga dananinaysaa. "Ha la soo baxo...  
ha la soo baxo... 'Sheentarkaa' layska rabaa  
...Ha la soo baxo... 'Curdiinada qaata'...  
Ha la soo baxo... Ciyowba imaadda... Ha la  
soo baxo... Qofna yuu harin... Ha la soo  
baxo... Ha la soo baxo..." ayey ku hugmaysee.

Ma yarayn dhibkeedu. Taa iyo taaba, dhidid  
 -kaa ka da'aayey. Way hooraysay. Gaashooyin,  
 wax ka hilaac dheer, bay labada kilkiloba  
 ku lahayd. Qawlaladana way ka xunbaynaysay.

### III

"Yeasiinka! Bisinkiyoo Burdaha!"

"Maxaad aragtay hooyo?"

"Naa 'Haakuma' iyo hangool dheer baan ku  
 hayaaye, wiilka meesha kala kac!"

"Haaye, hooyo, maxaad ka yooshay?!"

"Sudan! Indha saaban! Inama arkaan! Deyran,  
 oo Abaabiilan baynu nidhi!"

"Hooyo..."

"Naa hoogto, akhrudiyo mina-naaradda inagu  
 timi miyaadan arkeyn?!"

"OO MA BATUULA..." ayeyse kaga gudhay  
 bilisedii. Qosol bay la dhammayn weydey  
 su'aashii. Jeantay la wadhay. Kolkay hooyadeed,  
 "Aragaa nac...tar," wiilkii kaga la 'haw'  
 tidhina, way ka sii dartay. Bes bay ka  
 noqotay. Beerkaa cadaaday. Hadh-qoodaalkii  
 bay keligeed ka 'wix...wix' lahayd. Kolba  
 bawdadeey iska dhirbaaxaysay. Ilmaa indha-  
 heeda lagu hubay.



"Eeshow, eesh! Naa ka daa immisaan lahaa!  
 Ma curad xabag barsheeda oo curdina, oo  
 shalay uun bishiisii saddexaad madaxa la  
 galay, oo shaarac belaayo kastaaba marayso,  
 lala soo fadhiistaa la arkay! Saw waa biyee,  
 shaashoon maayo! Eeshow, eesh! Dhega adakaa,  
 dhegaha xanja laga saartu! Naa calaqadihii  
 saarka iyo sixir-wadayaal baa sacaafaayee,  
 dibedda sebigaa kala soo joog, lagu kari  
 maayo! Ku maqli mayso. Teedaa u cad: Teyduna  
 ka malafan. 'Waa laga baxayoo, waxaa waxba  
 kama jiraan,' iyo af ciil kaa dileey bara-  
 tay. Looga taag heli maayo. Maxaanse iskaga  
 xabeebin. Iyaduba lafteedaa boodaye, waa  
 caruur..." Iyo meeshaasay hooyadeedna ka bur  
 kudisay. Kii yaraa bay guriga reartiisa kala  
 soo jeeday. Way isla hadlaysay. Dhegteeduse  
 Batuuliyo dir kaba-le'eg bay la soo jirtay.  
 Dareenkay la raacaysay.

"Culugiinnu nama karo!

Cunsurtiinnu yaahuu!

Cudurkiinnu nama duro!

Iska hela curraafaha!", intay qoob-  
 koodii ku anbabixisay, ayey "naa bal kaalayoo,  
 qosolkaaba dhacye, biyo milix lehuun,

aakhirtu ka daba saydh, "ugu baaqday gaba-dheedii."

Wakhtiguna ma shakaalayn. Mean la'aana meel umuu fadhiyin. Xalay guuruu ahaa. Saakana wuu soo jarmaaday. Wiirawiirihii kamuu hadh gelin. Jidkuu ku soo dhignaa. Xagla laaban iyo dantiisaa is diidday. Cagtaa laga gujiyey. 'Taag<sup>t</sup>aa tallaabsaa' lagu yidhi.

Sigadna wuu soo toobiyeeyey. Surinba surin buu ku soo tidcay. Dhudo is daba yaal<sup>t</sup> oo darees<sup>t</sup>isa buu ka dhigay. Dhexduu ku soo martay. Tasmaday reer Xasan iyo Saddex-da reer ee kale wada oolka ku ahaayeen buu isa sii taagay. Kolkuu 'hoodi-dalaq' yidhina Guuleed iyo Sureertii ka yarayd oo garmaamaynayaa "Adeero! Adeero!" Kala soo hor booday.

Illayn 'waa muraayad caruurtu' layskama odhan. Sigad-kaynu eegadan qoyan ku haynay carrabka iyo Sigadka il-xun-lamatusaanka wejigooda ka hilaacay isku Sigadyo ma ahayn. Cirkiyo dhulkay isu jireen.

Habeen may wadaagin. Isku shuqulla may ahayn.  
Kala Sigadyo ayey ahaayeen.

"Yaa salaam, ma geesigii baa? Yaa salaam,  
ma geesigii baa?" Iyo "aashiin, Adeer aashiin",  
Sigadkuu qalbigiisu ku sacaba tumayey ee  
ransiga lagu dhan yahay sebi<sup>da</sup> ku qaabilayna  
Sigad horluu ahaa.

Sebiyada

Wuu inoo dhuuntay. Sigad, Sigadkaynu  
arkaynay ku lifaaq<sup>san</sup> buu ahaa. Hadhkiisuu  
ku aasnaa. Hadaaqii dhalaanka soo saaray.  
Maqalkooduu ku soo xuub-siibtay.

Lifaqan

n Shaacuna wuxuu medoobaaday, Sigad oo  
Sigad ah, oo waayo waayo iyo dhul-gariirka  
ka hor Sigadkii la yaqaanay ah.

Saacad iyo dhii-dhii buu xamildadii iyo  
caruurteedii la sii fadhiiyay. Xasan iyo  
axwaashiisa, war guud iyo waayaha jooga  
ayuu wax uga taataabtay marwadii saaxiibkii.  
Yaryarkii ayuu la baashaalay. Allaahu  
Akbartii baa yeedhay. Cishaa'i baa loo  
Adimay.

Aminkaasuu isna ka oogtay. "Amaana Alla iyo waa inoo beri" intuu ku ballamay ayuu xaggii albaabka dhaadka u soo rogay.

Guuleedna waxba kamuu danbayn. Dhaqaaquu soo dhaqaaqay buu ka wareegay. Af labadii ayuu yeedhay. Addimadu iskaga maray. "Aabe ii gee! Aabe ii gee!" Ayuu ku alaladay.

#### IV

Xera-dhiigtii kurta dheer duudkeeda ka oodnaysay baa dhabarkiisa ka soo hamaansanay -sa. Noobiyadii baa ka calan-walaynaysay. Go'ay ridaysay. Labada dhexdoodana I-dhegaysa -ama-ha-i-dhegaysantii baa ka yuubnaysay.

Barqa kulul bay ahayd. Fasalka la joogayna dabaqa labaad buu ku yiilay. Xiisadii Taariikhda ayaa lagu jiray. Gabaabsi bay iska ahayd. Baruhuna daaqaada sabuurada u xigta ayuu ka soo jeeday. Arday baa su'aal weydiiyey. Sharax dheer buu isna u galay. Dhinacanu uga biniixiyey. Dhankaasuu uga iftiimiyey. Kor iyo hoosba wuu ugu dhigay.

"Haddii kacaan laga wado isbedel buuxa,  
oo mug iyo balacba leh, jawaabtu waa maya.  
Keennu maaha kacaan. Waa Incilaab Milatari,"  
ayuu kolkii danbe ku soo gunaanaday.

Hud-hudkuna dhegtuu u ballaadhinayey.  
Eray ma seegin. Safka dhexe iyo miiska  
saddexaad ayuu fadhiyey. Ishuu miirte ka  
dhigayey.

Dusha-ka-arday, hoosta-ka-dhuhleeye  
ayuu ahaa. Kamuu ajoin Alle qabaygu,  
macallinkiisii. Wuu af-qaaday. Madanuu  
dabka u geliyey. Umuu hambayn. Kacaan-  
diidnimuu ku wanjalay.

Talaadaduu ku ribdhay, talaadadeedii  
kale, Guuleed aabihii laguma simin. Magac-  
ooda goor-qabow-la-soo-qaadkii, 'jidhkeen  
xadhaadh' lagaga cawdu bilaysan jirey iyo  
salidkuu ku qanjiidhiyey baa uga soo hor  
maray. Cagtaba umay dhigin. Biyana umay  
kaban.

"Kacaan-diid waa Soomaali-diid. Soomaali  
-diidna waa qaran dumis. Qaran dumisna waa

Qurmis. Qurmisna waa daba-dhilif shishee  
 -yaha u qabaana," iyo "qodobka 54aad baa  
 haysta. Dil iyo hantidiisoo lala wareegaa  
 u meel taal. Hadduu ka baaqsadana waa haddii  
 madxaa-ku-furay loogu bedelo. Taasina had  
 walba maaha. Waa uun haddii uu cidda ka  
 danbaysa sheego, kuna markhaati furo,"  
 intay isugu af-jaaqeen ayey iyagoo dhibi  
 leh ku soo digaafeen. Gudcurkiyo war-ma-  
 qabtadii bay ku galeen. Sac-dhexay mireen.

Isagoo Allihii, Alle yahay oo nabad u  
 mar furtay, sardhana iskaga jira ayey ku  
 baal-baaleen. "War caruurta! War caruurta!"  
 Intuu ku ololayey ayey huwiyeen. Afkay ka  
 jifeeyeen. Katiinad Jarmaliya ayey isu  
 dhaafiyeen. Indhahay ka duubeen. Dhooli  
 qafilan ood, gaalada haliganta naxashkii  
 lagu qaadi jirey mooddo ayey gurada ugu  
 cayuuqeen.

"Hootada sudhanoo, su'aal malahee,  
 cidii kan sugaysayey samir" ayey kula  
 soo dilaameen.

## V

Sheekana Soo-jeedihii xaafada ayey ku dhan tahay. "Gambadii haweenkiyo ku-tidhi-ku-teen maaha warkaygu. Layguma odhan. Galowna iima soo tebin. Maalinta la qatan yahay ee la qaawan yahay iyo Qiyaamahaa la ii soo qaladaa. Cagidaan taagnaa. Goob-jooge mudakara, oo samac iyo basar leh, oo dhegihiisaa ciiddu buuxin doonto iyo dhiniciisa u tudhaya baan ahay. Kuurkaan ugu jirey. Taaka-taakana waan ula socday," ayuu ku haaneeday ararta.

Wuu sii gacan-togaaleeyey. Hoos buu u dhaadhacay. "Maan gama'sanayn goortay goor-xun-socodku na dul-gawdiidsadeen. Rakada cidhifkeediyo falaagaan ku gamaarsanaa. Curigaannu is eednay baan ka kor-joogaysanayey. Qacdi horeen wax dhaadayba "ka-waaweyn!" iyo "qaar, qoryo dable la wareegay wareegayaa yimi!" ayuu dureenaygu ku dhiilaabay. "Alamtara!" iyo "Allaw... goonyaha!" ayaan ku af-waajiyey. Kolkayse gaadaha saantiisu dhanna noo dhaafi-weydey



baa laygu sii dhibcay. Dabayl baa igu foodhiday. Dhulkaa "dheglaa salagle... dheglaa salagle..." iigu sanqadhay. "

" Naftuna, "fadhi dhimaye Dhoorow, meel baasta intay goori, goor tahay ka maata-bax" iyo "Ilaah iyo taatika caawoo kale lagu fikadaa" bay haraga iigu riday. Anse, walaw ay faanba igu tahay, kamaen hoos qaadin. Dhegtaan ka xeeriyey.

'Waayeel wax isku falaya, oo Soomaaliya jooga baan ahay. Ilaah iima xil qarín. Nolosha qudheedana, qaneeceed badan kuma ogi,' iyo anigaaba qawadaya,' ayaan ugu quus gooyey. Nagtaan ugu xarfiyey.

"Wexbase yaan ku sii tiigaaline, bartaydii baan iska aaminay. Ciddi caaradeed kolay ku tahay kamaen nuuxsan. Jilibkaan u laabay. Omantoodiyo labaday horay u soo tuureen ee sahkooda ahayd, markay daaradda sidii laba dhagax 'dho' ugu soo yidhaahdeen, amminkay mareegaalayaashu iyagoo coker dib nooga fuleenee ay naga waran



jiideen, iyo intii ka dhex lahaydba, waan  
ula soo jiifay.

"Kamaan waalin. Shibtaydaen u galay.  
Intay wax galalafayeenba, anna waan ka  
guntayey. Keeb-la-yuurur baan ahaa. Xaggaa  
iyo xaggaa midna maan deyeynin. Iyagiyo  
daafta ayuun bay indhahaygu ku soo maqnaa-  
yeen. Tallaabaday qaadaanba, ku laaban ahaa.

"Kolkey hal-doorka nagala dhaceenna,  
sida loo badan yahay maan yeelin. Ibriiqna  
kumaan addimin. Calool adayg baan ka  
weheshaday.

"Badheedh cad oon qarsoodi lahayn baan  
marwadii gurigiyo makastii baroorta kula  
wadaagay. Guuxoodiiyoon damin ayaan qayla-  
dheentii ku dhuftay. Afkaan gacanta saaray.

"Ka kaca, kadantee, ka kaca  
ka kaca keli-kelidiyo  
intaan kaw-dhabaqsigae  
kiraaluhu idinku madhin!

Ka kaca, kadantee, ka kaca  
'Ragow keenada ku miro'

'Ragow kabahayga qaad'  
 karbaashkiyo ragow intaad  
 kabaalada yeeli-layd,  
 kufaa, waa kii kacee  
 wedkeedii loo katibay  
 kolkii ay wada kodlaan  
 nafiba waa tii kogtee  
 ku kaca kunfacii la naar!

Ka kaca, kadantee, ka kaca  
 ka kaca doqoniimadoo  
 ku kaca, Kama-kama, ~~Kanaa~~  
~~kama~~ kalaankiisii hayoo  
 kitaabkiisii watee!" Ayaan oode kaga  
 qaaday. Gelin baan sidii wiishkii h<sup>u</sup>gmayey.

Dhegse jabaq layma siin. Nafar waaxidi  
 iima soo bixin. Lef cad baan show, toobin  
 ku hayey. Cidlaan ka xabeebsaday. Candhuuftay  
 -diina dib baan u liqay.

"Wareentadi miyaa  
 wadadaw geshoo  
 waagii arjumay" gooraan ku walba-  
 haarayo, oo rajadayduba ay gabaabsi tahay,  
 ayuu ooggu soo kacay. Hilaabtii buu iska rogay.

Isagoo gurmadau bari ka soo kuday. Naacaw-  
dii arooryas xigtay. Nabarkii habeenkay  
bebis ula dhacday. Dhirtii baa la geb-  
laysay qiirada.

§ Dhimbiruhuna hengel bay qaateen. Galaa-  
yuuskoodii baa samada isku tolay.

"Guyaal iyo waa guyaal  
intuu geel-toosiyuhu  
gankii kuu soo baxaba  
gudmaa ugu xiirayee  
gilgilo buur yahay, gilgilo  
gadood ciid-yahay goglani!" Iyagoo  
weli garrida ku garaacay<sup>ay</sup>, cadceedduna soo  
dhalaashay.

Garaaca, 9394

[9394]

Jeerkaasaa xabaal bilaashtii laga toosay.  
Ardaa waliba gaarkii buu isu tiriyey. Mid  
baa 'hebel yaa lahaayeeey!' lagaga muusanaa-  
bay. 'Tolaydaa' ka yeedhay.

"Iska celiya waataa <sup>anaba</sup> 'nagu daawateene,' <sup>ayaa</sup>  
kay ologa ahaayeen, ee shalay birtu ay  
saarayd, kaga soo duushay.

"Isu daaya, ha isku dhiig baxeene," ayaa  
ku kale lagaga faqay. Isha leysku taabtay.

"Kolkuu na gartuu  
na gees marayee  
giraanlow Allow  
ku guuleeyeey," ayey qolqol kalena  
gabdho kaga heesayeen.

"Anse kolkaan, ardaa cudha oo, "maanta  
waa iyaga... Berri waa innaga," laga lee-  
yahay, waayey baan ka inaabsaday" ayuu  
haatufku aftidiisii ku soo ururiyey.

Waase nin weyn. Siduu wax u ogaana, wax  
umuu sheegin. In badan buu ka mastuursaday.

Eeggiyo subaxaana, geeddi dheer baa u  
dhexeeya. Sideed bilood oo dab ka kulul  
iyo dingaraaroyin baa ku gudban.

## VI

"Guuleedow sabaha ishii baa loo lahaa.  
Dib loo<sup>na</sup> arag. Meel daran iyo 'Godkaa' lagula  
daadegey. Jaajuusyaa isu dhibay. Juuq-  
dhegaystayaal baa kala tirsaday. Gaadhba,  
gaadh buu ku bedelay..." iyo

"Cadow buu u gacan galay  
iyo gaala ka hadheen  
Garasyaani iyo Gibis  
iyo gaasaskoodkii!

Adna kuuma geeyee  
qarqarsiga gardaadkiyo  
awal baan gubtaenyada  
guudkayga lagu hilay  
la gurguuranaayoon  
gondahana la haystee  
gochaagu Guuleed  
gocashiyo ku-taalliyo

soo kici gunaadkii!!!" Ayuu Sigadna  
ku gurxamay. Gawaan dhexe ayuu marayey. Cirkaa  
geeliisa lagu maalayey. Qunbacashuu ahaa.

Ka-sidiina madaxa kol qudha, kor umuu  
qaadin. Waraaqii Guuleed yaraa ku onkodayey.  
Iabada dhegood buu kaga waabnaa. Dushana  
ilmadii sebiga indhihiisa ka curatay baa ka  
dhabaan-dhabaysa. Cir-cadaa bay ku noqotay.  
Hortiiseey wadhnayd. Hareerihiseey ceeg-  
aagtay.

dhabaan-dhabaysa

Tallaabadiisuna ash may ahayn. Dhaqaaq iyo joogsi bay u dhexaysay. Cagtuu jiidayey. Umal buu la tiicayey. Nebdigana maaleey qadhaadh baa ka dhaansanayd. Meeris uma dhinayn. Dacar baa hulaaqaysay. Dab nool buu ka habayey.

Haddii la saro halbawlihiisana, malaha dhiig kama yimaadeen. Ibaatan gu' iyo dheeri ciil ku gororayey oo gaamuray, iyo cadho gadhoodhay oo xoorinaysaa loogu tegi lahaa. Naar baa 'haw' ka soo odhan lahayd.

Sidaa weeyee haddaba, taahuu Sigad ku warramayey. Habeenkuna, 'weeyediyo waa kowduu' kaga gurayey. Xasankay ceesho<sup>ol</sup> milixdiyo walaalaha Ilaah ahaayeen, ayuu halkiisii ugu jirey. Wehel ku lam<sup>m</sup>aan buu ahaa. Kal-laxiibuu ku soo gelbiyey. Ilaa uu ka gurya tegeyna dhega culan ayuu u raaricinayey.

Cee shoo -

Lammaan

## S I G A D

-----

Qadada dabadeedii ayuu sariirta isku kala yar bixiyey. Daal buu la kala dhacay. Xalay saamalayl buu ahaa. Saakana isagoo sidiisii ku soo jeeda ayuu Kulliyaduu Buuniga ka ahaa ku jarmaaday. Yoomayoomihii iyo kolkay cadceeddu ugu kululayd, hanfiguna ka duulayey ayuu soo laabtay. Wuu getaati ciiray. Inuu indhaha yar casaysto ayuu ku talo-galay. Waase la arooriyey. In dhawaale iyo in xigtayba hurdo aanu arag baa u timi. Wuu tiimbaday. Gaankii Gun-dheere ahaa oo afkaa marayuu isu daruuray. Gundhaduu jaray. Wuu quusay. Moolkuu ku daadegay. Kumuu baydihin moqorada. Dawaali buu u sii muquurtay. Sagxa-dii madoobayd ayuu sii taabtay. Dhoobuu ka soo qaaday. Garashuu ula tegey. Wuu la kaashaday.

## I

Waa yawmul bacad iyo xawaalkii ummadda ardaagiisii. Ilaah baa weyne, sawirkii

Buluq-baashka oo weyn oo dundumo le'eg  
 baa xagga koonfureed ka soo shaf ballaa-  
 dhan. Shimbir malag baa ku dul-taagan.  
 "Kolkii Baadi, 'baago' loo qoray  
 maxaa Baando, baahi loo qabay?" Ayey ku  
 maakhadaynaysaa. Daaftana dhuxun-ku-  
 reeb ayaa ku safan. Geel-toosiyaha hor-  
 tiisay ku faylsan yihiin. Garab-saar-dab  
 iyo digtoonow ayey ku jiraan. Waa belaayo  
 isku wada sar jaran. Janjan ayey u taagan  
 yihiin. Quruxsanaha-la-jecel-yahay bay  
 salaam ula maleegan yihiin. Nin koorloo,  
 kabaala sitaa, bigilka u garaacaya. Dara-  
 malkana gorayo heeryeysan.

Dhegeey, fareey iyo af-kala qaadkaa  
 goor uu la indha ballacsan yahay ayuu  
 inkaar qabtadii lagu saliday qoobkeedu  
 soo yeedhay: "Qab! Qab! Qab!" Waa kabtii.  
 Tii askariga weeyaan. Waa wexeedii xilka  
 lahaa. Afkaa soo yuuban. Way ku soo maqan  
 tahay. Xaggiisay u soo 'Nah! Nah!'  
 leedahay.



Isna wuu gegen-yehay. Dhulku ma haysto.  
 Ciiddu kuma dhegena. Haddana far ma garaa-  
 rin karo. Mayd baa la mooddaa. Habisea  
 saaran. Nafsadii baa laga siibay. Waa ka  
 bes. Nuuxsi kuma jiro. Waa la yuururiyey.

"Qab! Qab! Qab!" Waa calaftii. Tii  
 Suul-cayn weeyaan. Way ku soo socotaa.  
 Daaman qumanyo iyo dalqo bahal bay soo  
 leedahay. Way ku dhaarsan tahay. Dhiiggii  
 -saa u hilaacaya.

Naftiisuna way ogtahayoo, *halistay aragta*.

*e* "War hoogo, war hooge  
 waryaa habi-laawe  
 intaan hogol dhiiggi  
 dushaada ka hoorrin  
 asaan hengeshaada  
 halbawle daroorin  
 amaan haragaagga  
 billaawe hagoogan  
 asaan hambadaada  
 dugaaggu ku heesin

*ng* war meesha ka hawdhe!" Ayuu wadni-  
 hiisu ku 'Rig! Rig! Ieeyahay.

*Intaa*

Isagase kuma hadhin. Ma hinqan karo.  
 Halkiisii buu ku qalalan yehay. Samata-  
 baxna ficil baa ka xiga. Waana dhaqaajin  
 -ta mataanaha jeeniga iyo muruqiisa lamm-  
 aan. Ma se karayo. Awoodii baa ka maqan.  
 Way ka suushay. Wax weyn baa ka siya.

"Qab! Qab! Qab!" Waa qudheedii. Tii  
 ubada cuntay, oon biyo is marin weeye.  
 Xiddigtiyo calankii baa jiqilada kaga  
 nacaalan. Ishii guduudneed ee 'Guul-  
 wadayaashaa' ka soo horaysa. Sahankeedi  
 weeyaan.

Amuur! Waxa hor 'dhahab...dhahab'  
 laynayaa ilba maaha! Ka-weyn. Iaba daan  
 buu leeyahay. Waa af! Faruuryo ayey xiri-  
 bihi noqdeen. Xinjir guntan weeye cirrid  
 -kuna. Ilko seefa baa ku daaban. Raray  
 qooqay kuwiisii iyo iyo qabaallo weeye  
 qawlaladu. Labadaba wuu ka xoorinayaa.  
 Dhiig baa ka 'gobo' leh...

"Sida Baaniyaalada eey  
 bagal iyo bariid ma cuntooy

Biliyeey Batuulo kacaan  
baaloo baruurteenaa!"

"Baashaha kabtiisiiyeey  
baantaadu waa hilibeeey  
laga dheegay bawdyaha eey  
iyo burunji dhayla aheey  
baaloo baruurteenaa!"

"Beegsigeena loo bogayeey  
fay-gamuurtuu baashirayeey  
burushkaagu waa harag eey  
oday baasa laga jarayeey  
baaloo baruurteenaa..." Siduu ugu

orinayey ayuu ayuu aamusay. Wuu is yar kala  
guray. Nabar buu sidii ab-gurida 'Buufta'  
hayey. Wuu xiiq tirtay. Jeerkaasuu dib u  
soo leba-kacleeeyey, oo yidhi:

"Dhufaan-sugayaasha qaayaha lehoow, qii-  
radaa kacaannimo ee uu qalbigu ku seakimayo,  
dheguhuna ku naaxayaan, iyo qaraamidii  
waddaniga ahayd ee ka horeysayba waxaa,  
isagoo ka tusaalle qaatay maskaxdii gaa-  
xatay ee Hor-birkeenna koobaad, curiyey  
hal-abuur, digtoor, abwaan, afar-dayaxle  
~~Haameey, kooxda Hagan ee aan ka ah ba~~  
~~luuqdeedii haloosiga ahayd idinku soo~~

Haameey, kooxda Hugun ee caanka ah baa  
 luuqdeedii haloosiga ahayd idinku soo  
 gaadhsiinaysay, halka aad ka dhegaysanay.  
 -seenna waa Raadiyow Woodha, codkii Dha-  
 xaltooyada Qarniga, ee Asma-ooliya."

"Haddaba, annagoo weli badhtanka kaga  
 jirna barnaamijkii gaarka ahaa ee aanu  
 munaasabadaan kacaannimo ee daryeelkiyo  
 horumarinta dadweynaha, ugu tala galay,  
 Dhufaan-sugayaasha aanu u han-weynahow,  
 markana ku soo dhawaada oo ku nasta,  
 heestii 'Iaxaw Qaran' iyo farshaxanimadii  
 Sidiri-gan:

"Qaran feedhaha  
 Iaxaw fiidsaday  
 oo fin doob le'eg  
 u fadhiistaa  
 waa fajicisee  
 takara fow-fow  
 sidee loo fiiriyaa dheh!"

"Takara fow-fow  
 sidee fari ugu tegtaa dheh!"

"Qaran faan badan  
 oo fidhiikh jecel  
 kola faantada  
 iska fuudaa  
 fater weeyee  
 takara fow-fow  
 sidee loo fool eryaa dheh!"

"Takara fow-fow  
 sidee loo fiijiyaa dheh!" Iyo  
 sheekadaa intuu u dheg taagayey bay ku  
 timi! Way u soo dhex qaaday. Meel dhaw  
 buu ka arkay. Dhuuntay ka soo gashay.  
 Way la searrayd.

Intan iyo hadday se hongool tiigsigii  
 ula jirto, ayey kor isu hinjisay. Nugulka  
 ayey ka beegsatay. Xiniin yahay kaga  
 weehatay. Way ka hadhaysay. Hoos madow,  
 miciyo gal la' iyo fara shaydaan bay ku  
 soo foorarisay.

Dib ayey kolkaa u yarahe faadhamaysatay.  
 Boocay karisay. Sidii jabisadii bay is  
 neefaysay.

"Ku buruudi  
 ku buruudi  
 ku balaadhi  
 'Bash' ka sii

oo burburiii..." Iyadoo ku qabla-  
 maysa, oon dheg la qabto lahayn bay 'farma'  
 kula soo tidhi.

Isna wuu u baneeyey. Gantaal la ridee-  
 yey oo libidhsan isagood mooddo, ayuu isa  
 soo shubay. 'Qaq' yar mooyee, dhawaaq la  
 sheegaa kamuu soo bixin. Wuu ku margaday.  
 Sibidhkuu ka soo go'ay. Sariirtiibe wuu  
 soo weydaartay. Dhulkuu ku miyirsaday.  
 Beesadana way hor yaaceen.

Jug weyni se ma gaadhin. Wadeeca,  
 Alluu ahaa. Suxulkuun baa yar diirmay.  
 Gaabnida sariirtaa, Ilaah ugu arbeebebi  
 tegay. Isaguna muu ahayn hilib iyo nin  
 miisaan is-buurta leh.

## II

Waaba Sigad. Geed hadduu yahay galool  
 buu noqon lahaa. Comanuu ka beermay. Hawd

buu ka baxay. Ciid guduudan iyo suubaan  
gelgelimeedna wuu ku indha dilaacsaday.

Habeen dhalad buu ahaa. Waa loo haraad  
qabay. Dhogor yaraha kadinka ah, ee u soo  
xerooday, hashii fadhiisinka u ahayd, intuu  
ugu xudun xidhay, ayuu aabihii 'Warsame'  
ugu wan-qalay. 'Deeqsi' bay hooyadiina  
ugu dartay.

Min yareey ahayd. Walaasheed oo ka  
weynayd, intii laga qaatay, qori Maadhiina  
iyo faras ashkira ayey dheerayd. Qaali  
bay reerka ku soo gashay. Sheeka-laga-  
reeb ayuu arooskeedu ahaa. Qaafiyo min-  
weyntana wiil la'aantay ku garbisey.  
Waa loo han-weynaa. Boqoleyaal baa looga  
fadhiyey.

Gabadh bay se ku curatay. Runtaa  
fiicane, laguma farxin. Filan waa ayaa  
iska jirey. Iagu mase ceebsan.

"Waa balaysinkiiyoo  
ma ba'nay yidhaahdeen  
la arkee bishaariyo  
inay noqoto 'boowalay'!"

(99)

Tu kale ayey ku xigsiisay. Indhahaa laga yar dadbay. Saddexdii ashaaday ka dhammaysay. Looma qarin. Dhegahana looga ma duwin. 'Ma haddana!' Iyo afkoo la marooriyaa la is daba dhigay. Waa la qaniinay. Gaws danbeedkaa lagu qabtay.

"Weger iyo ka waasacan  
wadhi iyo heblaayooy  
ila arag huq iyo 'way'  
iyo wiirsigaan qabay!  
laga weri min-weyntii."

"Warku sii dabayl raac  
sida dhibic Wejiineed  
beeshii u wada gaadh  
dhallinyariyo wacyeel  
laga wabax dheg iyo maqal  
anna weelka dhaansaday!" Galowgii  
ku sheekee.

Sareedana baalkaa ka qoyay. Shimbirkii baa ka duulay. Saddex dhalkii bay iskula hadashay. Uur-ku-taalliyo walbahaar bay la qayirantay.



Madigii ay u dhaxdayna, xiisaheedii  
 kumuu soo dhawaan. Waa horuu ka gaagaxay.  
 Iyadiyo dangaladeed, umay kala sokayn. Isagu  
 mid bay ahaayeen. Gurina kumuu bariisan  
 jirin. Guur-doon ayuu waayadaba ahaa.  
 Inuu xile saddexaad ka xoola geeyaa u  
 go'nayd. Cagtiisuna xagiyo udubka Sii-  
 godan, ayey u badnayd.

Sidaa weeyee, haddaba, biya dahab iyo  
 dayaxoo shan iyo tobana, ayuu Sareedo  
 nabarkii fooshu ku soo booday. Waa loo  
 dedejiyey. Haddana waa loo dhaadheereeyey.

Nabarkaba se, nabar baa kaga kululaa.  
 Bilis afraad bay ka baqaysay. Werwer baa  
 ku kowsaday. Wadnahay farta ku haysay.  
 "Ilaahow waxaygii xilka lehna, maya...  
 Ilaahow maya...Ilaahow maya..." Iyadoo  
 ku taahaysa ayey umulisadu u timi. Xadhig  
 bay u soo daldashay. Waxay ka lulato,  
 kardhatooy, qaniinsanaato, dhididkuna  
 ka hooraba, kol danbay ka wareegtay.  
 Naftuna ku may soo noqon, jeereey "Waa  
 WIIII!" iyo mashxaradii eedadii maqashay.

Dhammays buu ahaa. Shifo iyo caafimaad  
Ilaah uun laga helo, ayuu ku dhashay. Bac-  
bac yaroo caman kuu-kuusan, qurxaaniya,  
oon indhaha lagu hayn karin, debedna loo  
quudhin ayuu noqday. Lix biloodba intaaney  
u buuxsamin baa firfircoonidiisii laga  
yaabay.

"Naa malaha kani, sideedoon u dhammaan  
ayuu kici!" Iyo "deeqsi aabihii, Sareedooy,  
dhawr gacma-daalis baa kuugu go'ay!" Baa  
xaawaleydi reerkana laga soo taagay.

Nas iyo nabsi bax bay hooyadiina ku  
heshay. Mudan, wiil iyo caanaba leh oo  
talada reer Guhaad wax ku leh, lane tix-  
geliyo, ayay ku noqotay. Wuu u hiiliyey.  
Habearkiyo heeryadii buu ka furtay. Way  
ku naqaysatay.

Kalsooni bay ku heshay. Hal-abuurnimo  
aaneey lahaan jirin bay la soo baxday.  
Way ku doob-dilaacsatay.

"Sidii cir guyoo da'aad, hooyo Deeqsiyow  
ishayda u doojisaa, hooyo Deeqsiyow!"

"Kolkaad Dayax soo baxdeey, duniduba iftoo  
kolaad ii daalacdee, mugdigii didaa  
qalbigu dawgii arko, dayawgii ka ba'ay!"

"Dabayshi i haysay baan, hooyo kaa dugsaday  
Daryaale adaa ahoon, Deeqsi kugu gam'aa! "

"Kolkuu ku yar daawadee, daymo kaa sugtaba  
'Malaa'igta daakiraysaa, ku soo degtoo'  
qalbigu kal dunuunucyoo, hooyo kuu ducee!" iyo  
buraanbur baa laga soo wadacay. Haweenkii  
reerayowgana, afkay qabsatay. Ray bay u noqotay.  
Way rigaysatay.

"Wanaagsane, wiilki aan dhalayow  
waayaale hadlaa, wuxuu yidhi  
'Hadhkiyo hooskaa wareegiyo  
adduum wax-walbaale loo daa!'"

"Wanaagsane, wiilki aan dhalayow  
dareen warramaa, wuxuu yidhi  
'Kolkuu waqal miray, daruurta ku wadho  
kolkuu waa-beryaa, hagoon wadaco  
cadeed waftiyoo, wil soo xidhatiyo  
aroor waafiyoo, udgoon wadatiyo  
sidii webi daad, u waalaystoo  
arliga wado iyo, wadiiqa ka sima,  
ciiddoo walanqiyo, dux wiiqa dhigta,  
xareed walacloo, war iyo godan  
ka 'Weeye' lehoo, washiirida iyo  
Awaare, il-waadsan, weydii !"

"Wanaagsane, wiilki aan dhalayow  
anaa warramoo, waxaan idhi  
'Warsame yimiyoo, Walaahigay  
nasraa igu waaban, Walaahigay  
dadkii waranliyo, Walaahigay

Adaa wadag oo, Walaahigay  
 ay

wadead iyo bilis, Walaahigay  
 yad waafiya baa, Walaahigay  
 la ii wadhfiyaa, Walaahigay,  
 salaam wacano, Walaahigay  
 walaalnimoleey, Walaahigay  
 dheguu ka wabxaan, Walaahigay,  
 adaan wejigaa, Walaahigay  
 Warsame ku heLo, Walaahigay  
 laguu wan-qalyoo, Walaahigay  
 wadeeca keliyo, Walaahigay  
 habeen walbaaar, Walaahigay  
 wareer ma arkoo, Walaahigay  
 walaacba i daa, Walaahigay  
 Walaahigayaa, Walaahigay!" Iyo hal-  
 qabsiyo kaloo doora, ayaa Sareedo, loo  
 suntay. Ilaah bay u shukriday. Deeqsina  
 way ku indha-kuulatay.

Adduun se ku yeeshood ma leh. Dhimma-  
 nuu isugu dhurtay. Dhammina waa laga  
 habaaray. Inqanantu waw dhelan. Sinji  
 buu u leeyahay, iyo sawrac aan gu'in.

## III

Deeqsi yarana, ladnaantii loogu ma sii wadin. Gudcur magan-gooye, iyo habeen madow baa loo yimi. Dushiisaa la fadhiistay.

Hooyadiina fiid-cawlkaa bay in la soo hayo dareentay. Listii xaaliga ahayd, oo sidaa u xoorinaysuu iska soo taagay. Wuu dayi waayey.

"Naa ma xoolahaa tolow, geed baaskii khadhaadhaa soo daaqay?" Sareedana ku tidhi yaab. Calaacashay ku yar dhibcisay. Way dhadhamisay. "Waaba doocanigoodii macaan. Culaan iyo car la'aan ayuu hadhumb-kuna sheegtay," iyo weji ururin bay isku dartay. Way isla sii hadashay.

"Bisinkee, Deeqsiyoo, caana diiday ma saaloona," intay ku walaacday, ayey "samata naja!" Iyo "Qaws, yaa Qaws!" ugu belaayo xijaabtay. Bogay ku sii gabatay. Isna 'ha i dhigin' buu yidhi.

Iyadoo fekeraysay dabkii is raacisay.  
Hanmiigana halkeedii bay ka sii wadatay.

"Yaa? Maantaba wuu siyaysnaayoo, sidii  
-sii iyo si u dhawtoona ma ahayn. Hurda-  
diisuna may fiicnayn. Hadh-galbeedkoon  
soo rogman, tii uu yar nogaamiyey, ee  
kolkiiba uu ka soo booday baa ugu danbay-  
say. Yaa? Salaasaduna soo gashayoo...mooji  
...khayrkeeda Ilaah ha siiyee...mooji...  
jinkiisiyo keedu...mooji...malaha isma  
oggola...Yaa? Ishuna casar gaabkii kolkean  
magasha xidhxidhayey waa tii gariirka i  
bilawday ee joogsan wayday..." Iyo meeja  
goor uu walbahaarku la marayo, ayuu kii  
yaraa ooyay.

'Ihi...Ihiidiisii' bay ku soo hamba-  
birtay. "Hee hooyo? Hee hooyo?" Iyo "Hoo  
bal naaska," intay ku ransi reentay, ayey  
ku duday.

Hooyo se waa gacaloo, garab-daarray  
weeyee, caloolyawgii ku abuurmay, oo sidii  
ugu oogan, cirkane xiddigtii geela loo

ridayey, weli ay galbeed ka sudhan tahay,  
ayaa saqiirkii laga soo gariiriyey. Hali-  
staa laga muday. Dhammac baa laga shiday.  
Oohin iyo af labadii buu miciinsaday.

Hooyadiina, qalaxa, qalaxiisii baa  
laga taagay. 'Bisinkay' ku yutu'day.  
'Burdahay' kula eeratay! Yaasiinkana in  
sharliyo, sharkeed bay kaga hagoogtay. ← (hagooqay)

Nabar buu sebigii 'waqaaqda' guray.  
Dhinbiil aad arkaysaa sidaa loogu dhejiyey.  
Goor danbaa se laga yar dabciyey. Xumadii  
baa ka jabtay. Tin iyo cidhibna, biya  
hoorayuu noqday.

Laga ma se tegin. Waa lagu soo kordhay.  
Matag ayuu, kolkiiba, bilaabay. Shuban baa  
xigay. Hor iyo dabuu noqday.

Siduu kolla u yar suurayey, kolla u  
'waa' lahaa, hooyadiina, "Hoogay Deeqsiyow  
...Xaawiyo Faadumo Nebaay, gurmada...  
Xamse iyo Cabbaasow, gurmada...Sheekh  
Cabdulqaadir Jeylaaniyow gurmo..." iyo



"Awowgay..." hebelowda ay u haysay, Awliya Allana, u xadirinaysay, ayuu waagu 'walac' yidhi.

Allaa qadaray. Ciriqii se habeenkaa Warsame yare ku yuurursaday, mid fool adag, oo cilinkiise la saari waayey ayuu ku noqday. Faalal iyo inuu madaxa qaadu u diiday. Wuu la daadegay. Yaahuu lakara iyo cunsur aan falawgeeda la aqoon ayuu ku ahaaday. Naftuu la qaybsaday.

Waalidkiina, siiba hooyadii, dedaal kuma baaqsan. Caalin wadaada, oo carrabkiisu irmaan yahay loo yeedh. Looga kitaab fur. Eeri daahira, ooy xareedi ka galac leedahay, loo keen. Taxliil ugu tuf. Lagu qabay, oo la cabsii. Firirix se ku odhan waa.

Aw la weheliyo, oo 'Minhaajka' daalacda, geedka loo waab. Toddoba caana maal u khilaawe. Qardhaas uu ku fara-yaraystay, qalin duura, ugu qaraf sii. Loo jaxaas. Casharra, khad riba oo malmal iyo xabag



hadiba lagu maciisiyey, loox kadiya, ugu qor. Lagu qulaami. Looguna maydh. Shimbir khayr se Alle uga ma dhigin.

Dabiib sheegan, oo jinka iyo insigaba, macna yaqaan loo gee. Ka ujuuro qaaday. Timihii ka muldhi. Ciddiyahana ka gur. Wan galaalan dhiiggii afarta cadcadba kaga duug. Sanka iyo dhegahana subag gorayo kaga shub. Is-bedel se rixin le iyo nas-teex yar-toona lagu ma arag. Wuuba kaga daray.

Aabihiina, kolkuu ina wax ka soo rayna ka waayey, buu qalbiga ka lingaxday. Wuu ka qancay. Qocn aakhiruu ku tiriyey.

"Ishiisaan arkaayoo, kani noolaan maayee, ka quuso," intuu af buuxa ku yidhi, ayuu, "Sii waraaqiise wax ha moodine, samir iyo iimaan ka qaado," hadalkii ugu soo gunaanaday.

Deeqsi hooyadiise, ka may yeelin.  
"Waa gartayoo, minyaro deyday baad timaha

u geydheysatay. Halkuu igaga yaal, kaagamo yaal, sagaal biloodna uur kumaad sidin," intay nebdiga ka tidhi, ayey, "Alla dilaa dhinta," iyo "naf Ilaahay leeyahay, waxaad ugu dardaar werisaaba waa denbiye, ka istaaq furuleyso," ku xajaysay.

Umuu jawaabin. Cawaysin danbe ayey ahayd. Aqalka reartiisuu ~~Gauleed~~ ka soo jeeday. Xeedhadii muqamada oo fandhaal ka taalaysan yehay baa hor taalay.

Gulhaad

Sareedana, sheeh bay u diirincaysay. Dabka coonkiisay kadaloobtay. Lix-na-jabe qaadkii jaandiga ahaa iyo kildhi jawley dhegta, haysay. La tacealida inankoodana, aabihiina ku dhehoo, qof Alle abuurtay, oo ay u daba joogsanaysay muu jirin. Teedaa uga go'neyd.

Kolkay culima Alla kala caal waydayna, kala may hadhin. Dhan kale ayey uga war-eegtay. Eedadii iyo xaawaleydiis reerahay, ula garabsatay.

Aroortiiba Arliya aleesha ka faalisa, lagula kalah. Iyaduna farsamooyinkeedii ula kala baxday. 'Kolo'...Kolo'' intay ka siisay, ooy "Been ha noo sheegina" ku abhisay, ayey aleeshii riday. Afkiyo san-kay maroorisay. Indhihiina mid dansatay. Tay la soo hadhay bay kolkaa ku biniinixisay. LO'diyo laxihii oo sidaa u guntan baa ka soo eegay dhulka. "Yaa! Yaa!" Iyo "Naq maxay leeyihii!" bay ku gunnuucday. Way xaabisay. "Run noo sheega" ayey intaanay ridin, ku af-waajisay. 'Shax' bay goortaa ka siisay. Iyaguna sidii hore iyo si la mida, ayey isla soo mutuxeen. Saddexdii ashahaado suur bay ka dhammaysey. Waxii uga daahirayna way ku camal fashay.

Ceesaan madow oo seenya ah intay ku gawracday, bay iyadoo, "Yaahuu...Ceyna naas ka yaahuu...Il-ceyn ka yaahuu..." Ku candhuuf tufaysa, carrabkiyo ganjaafu- lihii rida, ka meerisay. Harageediina ku haurisay. "Waa uunigaagee, ku uunso!" Iyo "Ha ka nixine, ku naax!" Ayey dhegahana intaa kaga afuufaysay.

"Xulbad taxan iyo idiin goorta ha loogu xidho. Xabeasud ha loo jeeni qaaro. Gac-maha xildid ha looga lulo. Baraarugna, 'hala-hala' ha loogu tumoo, dhaadka ha loogu giraamiyo," ayey tidhi. Waana la yeelay. Waxba se umay tarin.

Khaliifad wadaada Ree Fiqi Buracle iyo Ilma Fiqi Kaatunba la kalaanta, ayaa kolkaa lagula eertay.

"Cadar Abu Bintiya, yay doonayaan bil-amaara cund, yay doonayaan yaaquuti bilab, yay doonayaan cafasiyed bohriya, yay doonayaan jaawihi Bumbeey, yay doonayaan baxri iyo bukhuur, yay doonayaan afar baarriyoo, benderkii Mahraaj aad ugu banaan, yay doonayaan!"

"Basar iyo xarago, yay doonayaan laba baal cadoo, laba baal madow kaga tegey baruud, yay doonayaan!"

"Salool bayl aho, baahne ka iman  
 afar bayna jaho, lagu baydhiyoo  
 kaa baajiyoo, dib u baaciyoo  
 buus lagu yidhaa, yay doonayaan!"

"Beer sugulihii, yay doonayaan  
 bun-sharaar la dubo, yay doonayaan  
 baabaco subkihi, yay doonayaan  
 barkaalihii, yay doonayaan  
 shaadali bil-khayr, yay doonayaan  
 bilaal<sup>→</sup>yo ma-jabe, yay doonayaan  
 buuxsame fataha, yay doonayaan  
 shay aan la badhin, yay doonayaan  
 belaayada xiyaab, yay doonayaan  
 ballan aan la furin, yay doonayaan  
 beegsoo, budhsii, yay doonayaan  
 shuruud aan la burin, yay doonayaan  
 oon baqas lahayn, yay doonayaan  
 barkhediyo ijaab, yay doonayaan  
 boqorradu af garad, yay doonayaan  
 ooy doonayaanoo, doonayaan," ayey

Khaliifaddu ka werisay wadaada.

"Mas ciideed baa nagu mataansanaa. Cad-  
 arkiyo dharkana, casaankaannu ka caadanna.

Nooguma baxdo sooc takhtiya waxaan ahayn.  
 Sanif iyo badhax sinji dheemanna nala ma  
 tuso. Jinkayagaa noo diiday. Way naga ree-  
 ban yihiin," iyo "Mashiikh baannu labada-  
 yada haamoodba, leenahaye, noo ogaada," ayey  
 Fiqiyada tibeaxdoodii ku soo ooday.

Intay calmadeen iyo carifaadoodii baa  
 lagu hawl galay. Dhexdaa loo xidhay. Mag-  
 aalo weyn, aan kolkaa muraad kale laga soo  
 qunsanayn, baa awgood loogu dhaadhacay.  
 Dhengedanna wanan ay badhidu dhulka xaa-  
 -bayso iyo orggi goolal, aad ku misaashaa  
 lagu sii dhuftay. Waa laysku taxalujiiyey.

Wax la sugoo, la saadiyaba, caana-  
 maalkee ku afar iyo toben ahaa, ayuu  
 safarkii soo daf yidhi. Waa la furey.  
 Fanidaad baa loola dhaqaaqay. Xabad, xab-  
 ad baa kor loogu qaaday. Dalabkoodii baa  
 lagu sugay. ~~Xaraf~~ kamuu baydhin.

"Abshireey! Abshireey!  
 Ayeeyaa deganoo  
 aqalkeedu yahoo

Waa calaal illeyn  
 warka aad u heshee  
 'Safar baa iman bay  
 aftideedu ahayd.'

Abshireey! Abshireey!

'Oday bay warrambo  
 udubkiisa 'adduun  
 Axad baa la turqoo  
 Ayaantii ku xigtee  
 lagu iiday 'rdaa  
 waa Isniinta udgoon  
 inne haatan illeyn  
 Hawadaan ka urshoo  
 Wansi baa urayuu '

Sanku eegga lahaa! " iyo dacco goo-  
 -goose ayay Khaliifadiina kala hor timi.

"Dabayshiinea na salaantay. Goorahanba in-  
 -aad na soo haysean waannu ogeyn. Daahir-yaa-  
 shamis baa na loogu muujiyay. Quud Awliyaaad baad  
 sideen. Waannu ilaashaneynay. Taaka-taakaannu dh-  
 -ulka ugu jirraa. Garab-daar baannu leonahay.  
 Inta noo soo warrantana, Qudun-quutadea ugu  
 taab gaaben. Iyadana 'Soo-def, soo-daftii' baa  
 ka dhammaatay, ayay ku soo dhawaysay.



'gabtiina, daaco-goodliyo, "Waa la qabala-  
-yoo, maqbuula weeyaan," intay kaga taqaba-  
-shay, ayay u raacisay, "Waa yeel baannu nahayoo,  
waannu u golin danbeedsannaa. Waalmahana Khariis  
kheyriyo Isniinta amran, baa nooga sheeggan."

Is-diyaarintiyo hayshe xaal-qaalkoodii baa  
intii horoo dhan laga jiray. Kolkaa so saleadii  
makhrib foodda laga qaaday bay, Cuudisadii  
Deeqsi yare la wareegtay. Shaalkii guduudnaa  
ayay la hawatay. Dab-qaadkii bay u gelisay.  
Way ugu riday.

"Awoowayaal, hadaad xariirtii saafiga ahayd  
ee reer Fiqi Buraalle, iyo axraartii suudiga  
lahayd ee reer Fiqi Kaatunba tihiiin, Awoowayaal  
shuruudihiiinii oo dhammi, waa tanaam...."

"Awoowayaal, idin maanaan inkirin, oo idin  
maanaan ilaawine, Awoowayaal, ha noo cadhoonina..!"

"Awoowayaal, il-rixin oo raxmadeed nagu soo  
jaleeca...." ayay 'mood' wadaadadii ku tidhi.

Dacay isku daba cabatay. Garbihiyo feedh-  
-ahay sebigii ka taa-taabatay. Awwyada la had-  
-alkoodiina, halkeedii bay ka sii wadatay.



"Awoowayaal, sii daaya.... Saadiir weeyee sii daaya...Awoowayaal, sii daaya Qurbaanka.... Madaxa uga kaca...Awoowayaal, macdantiyo min- -jaha u sii daaya...." ayay nabar, Ficiyadii ka duraensatay. Intaana, rakaadda way daba dh- -igaysay.

Waxay se hadaba, aakhirkiibay, "Awoowa- -yaal, cudurkiinna la argye, caafimaadkiinna oo 'sareecan, sareecana' ha la arko!" iyo daaco dheer, la kalaankii wadaadada ku soo khat- -intay. Maruuro la sheego se kamuu helin.

Nin bukana, boqol baa u talisee, Cawraladii loo ishaaray caruurta, kolkaa xaggeedii loo la irkay.

Casar baa lala baxay. Dumdumo gaaban ayaa lala dhinac tegay. Nin gadhloo, muraayad is hor hayaa, makiinduu galkeeda ku sawiran yahay, baa loo laga diiray. Duur la kala jeexay baa dhexda loo geliyay. Daab ayaa looga dhigay. Dabadaa lagu dhegay. Waa lala dhacay. Beer- -yaraa laga sar-saray. Caabuceedu ha soo dh- -aafaa, la yidhi.

Kalkuu dhiiggii is-qabsadayna, milix iyo ciidii aboorkoo isku dhafan, baa nabarradii loo la tegay. Waa lagu xaqay.

Cusba-labna joogtaa looga dhigay. Iyadiyo qori-xoq gumareed baa laysu daba mariyay. Kalba midkood baa lagu sanceeyay.

'Dab iyo xanuunna, meel ma wada jiraan,' waa la yidhi. Oof, Xulbad, Sunbay, iyo fall-aadhba, laga gub.

Dir-dalaayeed iyo sidii madane, loola dul taagnaa, ayuu oogadii ka bislaaday. Ifkaa lagu cadaabay. Dubkii baa ka hoodhay. Wuu gal-dhacay. Haaddaa laga ilealin jiray.

Xabaashiisuna sannaday, afka soo kala hay-say. Diiq buu galay. Fandhaal bay hooyadii ku dhuunyi jirtay. Cudur baa ku fogaaday. Bukaani milila iyo doc-yaal buu ka dhigay.

Madax rifan, dhafoor hulan, indho godanoo god ka soo jeeda, iyo lafo isa-sudhan baa ka soo hadhay. Haraggaa ka weynaaday. Shu-shubo ayuu yeeshay.

Wuu se iska noolaaday. Heddiisa oon gelin  
iyo geed-adaygnimuu ku soo doogay. Xabaal-mari-  
waa buu noqday.

Warsama iyo Deeqsina wuu ka baqqsaday.  
Xanuunkii ba u diiday. Magac kale, oo uu ku  
caana-maalay ayuu se ka dhaxlay. Sigad buu kula  
baxay.

Hagaas, qaerka sare u weyn, oo minjo  
xiida lehoo, siigaduun isku aasa, isagoo ah,  
ayuu qol-qolkii hooyadii ka cawlaan jiray.

Kolkuu gurguurad holiyayna, asaagii way  
ordayeen. Wax weyn bay se, u ahayd isaga. Dayga  
ba'ay, dedaal iyo is-tahbiib aan yareyn ayuuba  
ku gaadhay. Duq bay inteeda ku ahayd.

Isna wuu la qabsaday. Afartaba inuu ku  
lugeeyo, ayuu qabatimay. Siduu ugu xafaarayay,  
ee uu habaaska ugu la dhex jiray, ee ay gocon-  
-dhadu ula hadhaysay, qodaxduna ugu rooreysay,  
ayay qeyirmeen.

Lisankiyo rifaankii ba cayntoodiiba,  
dooriyay. Deeblayaal madow, gaatiroo adag, iyo  
gomodii geela, ayay ruuggagu soo baxeen.

Calaacaluhuna, way gal-dhacdeen. Jaan-geri bay isu rogeen. Ka tage baabacocyinkoodii. Beri bay ahaan jireen. Iyagiyo cagahana, reys-ma-ga-  
-adhadaa u dhexaysay. Halkoodii bay se u galeen. Dhawaa laba, wuu ku jaceefinayay. Laba duggalle, ayay shaayeen. Dab inuu la rumbtay, ba la mood-  
-ayay.

Duumaale wuu kicin. Shan jir fadhiida, oo daba ku siqa, isagoo ah, ayuu gugu curtay.

Ruus caloosha intaa le'eg tahay, oo wax ka gawso waq-weyn, ilaahna hadal udhiibay, ayuu ahaa. Sidii ruux mudakar ah, ayuu u sheekayn jiray.

Aynigiisiyo ciyaalkana, warkiisu wuu ku dhammaa. Laba uu leeyahay intuu isa soo daba dh-  
-igo, inaanu ku eryoonayn, ayay ogaayeen. Adyad iyo ilaaq, intay sheed ula soo joogsadaan, ayay halkaa uga kiili jireen.

"Uray, ogaan biijo

Uray, ilka raaran

Uray, af-la-ssay..." yay ku xasor-  
-adayn jireen.

Iana kuu gaanta ku dhigo, laga ma soo  
gaadhi jirin. Wuu xabaal-nololin jiray. Waalidkii  
dhalay, intay soo roorayaan, ayuu askaxiisa  
qaadi jiray.

Wuxuu ee ciilba, ka karay, oo ay hooyadii-  
na, kal iyo lab uga mashxaraday, Waalintuu  
Tallaabsaday.....

## IV

Toddoba jir ku garban, madax weyn, oo  
af-dulqaan isagoo ah, oo laba ayd oo cas-cas  
iyo dhenged madheedha sito, oo irifsanoo bisbis  
leh, ayuu magaaloo soo galay.

'Kaabul' is-naglay, oo Islaah-hadh-  
-woyntiye, adeerkiis oo ah, ayaa loo keenay.

Tobankii inan, ee sannadka Iskuul ga-  
-alaadka loo qaatay, ayuu safka hore kaga soo  
baxay.

Aroortii danbana, iyadooy sabuun cad-  
-artay ayadii ugu soo fool-dhagday ka soo  
kan-kanaysa, oo maan-waxadkay ugu soo

dhaashiday, tirsho iyo dhabanedaba ay ka hil-  
 -sacayso, oo uu sheadhkii cadde ee Baaliinka  
 ahaa, surwaalkii gaabnaa ee Kaaki Mareykanke *Weli*  
 ahaa ee Saalax Raabuur looga fasilay, oo car-  
 -jabin, iyo kabo maasa oo 'jiig, jiigle' ku  
 taagan yahay, oo uu sidaa iyo sidaa isu leef-  
 -ayb, hadhkiisana u daawanayo, ayuu daartii  
 dhoerayd ee ordaxa jiingada ku lahayd, iyo  
 dugsi Baranjigii iska xadiriyaay.

Intii faalke, koobaad ee ula-uus-  
 -buurta, dhamaanta baratanka ka soo bilawday,  
 ayuu ku jiray.

Ka-sidiina, wuu soo ordayay. 'Dhuguc'  
 iyo 'Dhagac' iyo 'Iaysu-ma-joogsadaanka' ayuu  
 dhankiisa kaga soo jiray.

Galabtii ku yimi. Daan-ku-gasle soo god-  
 -an, oo golxale, gadhkuna uu hamashka dhigay,  
 weeye.

Suxulladaa diiran. Shantiyo dhabankuu  
 hayaa. Wuu dhaka-faarsan yahay.

Sariirta dhaegeedii ayuu ku tiirsan

yahay. Bartuu sibidhke, ka hindiyay ayuu sidii  
u yuururaa. Sa'aadii Casarna, was loo adimay.

Sigad se agagaarkaba, muu joogin. Jeer  
horuu ka abaaray. Canaduu ku laalaa. Hamigiyo  
xusuustuu ku sahan togay. Hoyhaat ayuu ka sha-  
-xayay.

Kolkuu se eedaanku yeedhay, ayuu ka  
soo degay. Kagganuu eegay. Darbi baa ka hor yimi.  
Kaggaasuu jeedaaliyay. Darbi kalaas isku soo gud-  
-bay. Afentii gidaar ee edegtaa isu dhiibay.

Wajiguu, kolkaa, gacanta sidaa u mari-  
-yay. Indhuhuu yar marmartay. Shaarubuhuu miiday.  
Gadhkana middigtuu ku daabay.

"Alloylehe, -inteedaan ku sugay!"  
intuu gaws-danbeedke kaga reemay, ayuu Sigad  
kor u hingaday.



Q A B Y O

---

Madal weeye laysku arkay. Daad hubeysan baa ku soo jabay. Giraan dadaa ku xeeran. Loo ma kala hadhin. Il-yartaa is-qabatay.

Shir gimidha weeye. Mucaaridkii gacanta maal-ayay, oon hebel magac leh iyo hannaas la sheegaa tooni u maqnayn, oo udbihiisii wataa ku soo bul-aday. Oodi uma laala. Mee luu jirayba maayad baa ka soo hincatay.

Shaaglayaashaa la soo halabsaday. Lug iyo far-asna loo ma aab dayin. Cidhibtaa lagu soo dhuft-ay. Toobiyahaa la kala hororsaday. Budulkaa lagu soo jiifsaday. Waa la soo qudhqudhiyay. Afarta beyna jahaa lagaga soo caana-shubtay.

Ergooyin ay ururo soo igmadeen, oo wilaayad \* sitaa fadhiya. Guurta waayeela baa ka goob-jooga. Kor-socod wax-walbaale ah oo higilka iska soo raacay baa duleedka ka gabran. Dhab-dhablihii magaladaa dhex boodaaya. Kub-ku-siigaale miyi baa kulaalaaya. Caga dam-damle, Afku-xoogle, iyo Gurdamadii Bihni Yaqaan-dhibe ahayd baa ku ged-aaman. Muskena Foda-ku-hayaa ugu sii laalan.



Shir gimgiman baa ka hagaagay.Hirashaa lagu galaday.Mulaax baa loo siiyay.Sidii haro buuxsantaa loogu soo habqamay.Bad baa ku soo faruurantay.Rag baa lagu soo fahsiiyay.Daafuhuu marayaa.Ciidii Camaarey baa ku soo dhacaaqday.

Tabnigii shinnidaa loogu xoonsan yahay. Birtaa is-haysa.Waa daf iyo midhiq.Ushii cirka loo tuuraana dhul dhici mayso.Baso diiran, madax boosha, iyo baar madow baanay meel ay ka martaba heleen.Ceeryoon weeye.Bad nool baa ceegaagta.

Hadalla, gelbiskiyo arooskii loogu dadab dhigay, ayuu ku gudhay.Shantaba dhabankaa la saaray.Waayo-waayo hankood iyo xusuustii Hen-oolaatadaa loogu dabaal-degay.

" Libaax shaarubluu naas  
Shifo kula af-searoo  
Bili baa ku shaadiran  
Shin-ku-dhaladna weeyee  
Barigaa shabeelada  
Aad loogu sheegiyo  
Bad shidaad la huguntoo  
Shafka baacinaysiyo  
Dabaylaha shimaaliga

Rag shukaanta laacoo  
 Xeeb kaga shiraacdiyo  
 Hawd shaashlihiisiyo  
 Sheedaha galbeedow

Sacab laba shub iyo jaan  
 Iyo shuqul gobaadeed  
 Shay cayaari leedahay  
 Intaa shagax ka siisaan  
~~Kolba~~ shalaw, abraartaan  
 Ilaa shaacuu uu dumo  
 Shaac kalana soo baxo

'Guulallee, shirkow guulallee'  
 Ku shamira cod iyo jiiib  
 Kuna sheda hiddiyo dhacen "  
 Shimbiruhu ku heesoo

Dadabtoo shadaab iyo  
 Bohri yaable shidatoo  
 Shaxshax iyo hibaaciyo  
 Sharraxii arooskiyo  
 Ku xidaysan shaxanoo  
 Bilic shaamareeriyo  
 Ku il-xidhan shagaaroo  
 Qurux shuurinaysaa  
 Shalmadaw lulaysoo

Shamsadaa mashxaradii  
 Shaanshaan ku laashoo  
 Shirixiyo galoolkaa  
 Shax ka siiyay baarkoo

Hirar kala shisheeyoo  
 Sheekada wedaagoo  
 Shucaac wada xariiriyo  
 Shaani lagu dhex-rooroo  
 Dahab shiilan iyo luul  
 Lagu soo shakaaloo  
 Shaki li'i jaleecada  
 Sida shabakad jiitiyo  
 Kulunbaawi shiikhliyo  
 Shabad aan car-jabinoo  
 Shaagluhu intuu yimi  
 Ama dhiiggu shalax yidhi  
 Heegada ku sheelayd  
 Sagalkoo shulaha dhigay  
 Yawga booday shiribkoo  
 Shabaabkaysu laba rogay.

"Anna shawrka muuniyo  
 Shalashkii xorriyadiyo  
 Ku hagoogay shaalkii  
 Sharaf loo dagaallamo "  
 Badh-daloolku shiinkiyo

Ku soo gaabi shaqalkoo  
 Laameeri shiishkoo  
 Hawadaa ku shaandhee  
 Shii rasaasa iyo gumuc  
 Roob shuuxay kaga yeel  
 Snakadaha ku faaruqi .

"Shirku, bilan, shar naga baydh

Ha ka naxo shan-xuubluhu

Afku-shabaqle ciilkiyo

Mililkaba ha shuuqsado

Shanshadana ha kaga jabo

Xaggeenana ha shaafiyo

Shoocadiyo tacluustiyo

Ha ka maydho shuushkoo

Shaalle warkiisuna

Afarteeda kala shedan

Ha shaaco dunidoo

Daruuraha ha sheegsado

Cirka shookadiisiyo

Buluuggaa ku shaaximan

'Shaluu maray' ha laga dhaho "

Ku shalaaday ciidduna, "Soo tebi nin taaynaa.

Wacdaras u dhacay. Sagaal jirro aan irmaenayn  
 baa galawda loo taabtay. Goolal uu farawgu goobay,  
 oo kurusku intaa le'eg yahay, baa dhuunta looga  
 lisay. Xil baa u guntaday. Xarragow adeegtay.

Milgaa lagu daahay. War iyo sheekaa ka hadhay.

Eegga se dadabtiisu waa duug. Muddaa lagu dul goofalaa. Waa la berrinsaday. Sidii maalinba, maalin loogu sii amaahanayay, baa lagu degel-jab-saday. Habaaskaa ka duulay. 'Ha fadhido, Faraw,' baa ka dhacday.

Loo ma kala kaco. Maantiyo, lingaxa maalinba laga gooyay madashuna waa isku tabni. Sida ayuun baa la ahaa.

Waagii Alla keenaba jilibkaa laysu laabayay. Labada gelinba, gorodaa lays kula jiray. Dhulkaa la jifaynayay. 'Gawdaa' lagu hayay.

Af la gaaxiyana lali. Intaaba golaha, 'Idhi' -daa ka yeedhaysay. Jaantaa rogan iyo gees garaac se xaa'jadu ku may socon.

Hadalkana lama hooshayn. Meertaa ka xeereyd. Miilaysi baa jiray. 'Qaetaye, qaado', ayaa taalay. Waaylaysu baac-baacinayay.

Geebkana sidiisaba, geenyo fuulimaad-u-joogga, ayay baanisadu ka ahayd. Kolkuu nin ka degaba, nin kalaa isku laalayay. Nasiibkiisuu ka qaadayay. Lays kuma qurdiyayn. Qorigaa loo tuura-

-nayay. Nimay rido, iyo nimay la xarragootaba,  
xadhigeeda, ayuun baa laysu dhiibayay.

Xaaji Colhaye sehaatan ka horow,  
hadelka umuu bixin. Samir buu u lahaa. Wuu u gelin  
danbeedsanayay.

Talo hojiyeen, hubiina leh weeye. Waa  
ruug cadaa. Afartaneeye sanaba, Geedkuu tegayay.  
Gartiisana wuu yaqaan.

Miyi buu u badnaa. Magaalana kamuu madh-  
-nayn. Ragii Burma ayuuba ahaa.

## II

Wax buu ka ilka cadaa. Lix iyo toban jir,  
baar-fura, sulub ah, oo caana dhana ayuu ahaa.  
Raganimuu la kacay. Ludiisaa lagu jiray. Lalinimaa  
ka muuqatay. Ilaahaa raas ballaadhan oo baxsi wiil  
iyo bar xoolaadba lagu maansheeyay, ayuu ka beeray.

Min-yarada xaggeeduu ka soo jeeday.  
Toddoba ay bilis xaawaleey ahi tarraxdo, ayuu  
mudanta kaga jiray. Gabadhii kal hore la raray,  
ee guriga yeelatay, baa kor uga weyneyd. Shanta  
boqolle ee kalaba, isagaa ka lahaa. Hoos bay uga  
yaraayeen. ~~Ragimuu ka kacay. Hur-hooyee~~



Uur hooyuu walaal kula ahaa. Bahnimuu ku raacayay.

Docda kale iyo min-weyntana, afar dab ka kulul oo curadkii reerkuba uu hor boodayo, ayuu geeloodu ka dugsanayay.

Wali Allaadse, Colhaye, jaceylka dhogor-  
-idiin-laha, lagu tallaa. Meel baas buu kaga mudnaa.  
Muunays iyo saddexan ay wadato, ayuu waayadaba,  
daba joogay. Isniintii labaad baa ugu soo geshay.

Ammin kaada oo kulul bay ahayd. Ceelkana qaboonadii ayuu naadada ka bilaabay. "War baadida geela yaa arkay, ooy baadidii bariday?" siduu ugu yaboohinayay, ee uu dhegta u haystay, ayuu xabeeb-saday.

Isagoon se ka hadh-gelin, welina, "Qar-iyow, lagaa cari, sheegow, laguu sheegta" haya, ayuu gaalo askar qoranaysa ka dul dhacay. Si Alluu isagu taagay.

Foolaadkiyo regga firigiisii geela ka soo jeeday se, saakuu Faranjigu miidhay. Gungun-aaf lo'ley u badan iyo gaageeb aan sidde la qabtaba lahayn, baa hadhsanaa faylka.

~~Wada hadalla, kolkuu sidii adub la aalay~~

Wada hadalla, kolkuu dheegooda, sidii  
 udub la aslay isu dhereray, baa ~~u~~ danbaysay. u  
 Garabkoodaa Ilaah ka baxay. Nuudhigoodiyo meelay  
 cag iyo jaan dhigeen baa la waayay. Dhulkaa liqay.

Colhayaa qariyay. Wuu ka mudhay. Gond-  
 -ihiisay ku baaba'een. Galool is-maqlay, oo ay kor  
 iyo sidaa u cegaysan, buu ku noqday.

Isagiyo safkuna is-may arag. Cagba muu  
 dhigin. Sidaaduu u gelay, iyo "Soo baxdii" gaalada  
 maqadinkoodii uu turjubaanku, ka weriyay, baa is-  
 -lahaa.

"Toorkani muxuu ahaa?" iyo 'Tolow Fara-  
 -njigu, ma geel buu ku darsenayaa? indho ku hiif-  
 -tamaya, iyo wejiyo guntan baa laga sii daba tuuray.

Max badan ayuu se Golhaye, baar-qab-  
 -koodii Ina Qaabil ahaa, la wadaagay. Gole-joog  
 wanaag buu sheegtay.

Hiddig-xige 'Oob-jacda', 'Garab saar  
 dabka' iyo 'Is-beegsiga' ba ku 'Is-maadha' ayuu  
 soo baxay.

Dagaal 'Hool-maankii' labaadna, 'Gubni-  
 -yadii' maraakiibte lagula birmaday, ee ay



'Mina-waaradu' sii galbiyeen, iyo 'Saw-jaradii'  
 'Inagu soconoo, Sarkaal na wadye  
 Cidii na sugeysayeey, samir:." ku wigleynayay  
 ayuu ku jiray.

Shakadaa u meersanayd. Sumuc qoriya, oo u  
 labadiisa indhood ka jecel yahay, oo saxarka iyo  
 sufurtaba uu ka dhawro, oo uunan dhulkaba u  
 oggoleyn, ayuu ganafka la taagayay.

Behalaha cagaha leh, ee silsiladda cant-  
 -uugsan wiilasha isla tooxayana, u muu eggeyn.  
 Waxba iskaga muu tirinayn. Kow-iyo-toban lihiisuu  
 ku-walba kaga kalsoona.

Gacantiisuna, miduu hubo ayay ahayd.  
 Surma-seegta la'aan ayuu uga bartay. Niyaddaa ugu  
 fadhiday. Wuu ku tashanayay.

Iba middigluu ahaa. Inkaar ayuu liishaan-  
 -ka, ku qabay. Bidixduu wax ka toogan jiray.  
 Xabbadiisuna dhul-dhac iyo seeraar-toona may  
 lahayn.

Fartaa loo taagi jiray. Hibaa Rabbi dhoog u  
 siiyay. Barbaar sheeggan, oo labaatanka gaadayuu  
 ahaa. ~~Ba'el ba' ke taagnaa. Carbuhuu iske carrabin-~~  
~~ayay. Hadhkiisana wuu is~~

Baal baa ka taagnaa. Garbahuu carrabka iskaga leefayay. Hadhkiisana, sidaa, ayuu isu hor hayay. Muraayad buu u ahaa.

'Iaarmigii' dagaalkana waayihisuu ku qaabilay. Dhego wadan iyo garaad dhallin-yar buu kaga war-qaatay. Farma' iyo fudaydkuu geed-ka-boodku lahaa, ayuu ugu rixiyay.

Xiniin-yihii baaluqe-is-moodkaa shid-ayay. Jibbaa haysay. Saar baa ku soo degay. Meel kalaa looga yeedhayay.

Maalmahay heeganka ku jireenna, barb-aartii, " Markuu raggu duulo, raar ma galoo Dagaal ramataannu, leenahay," ku-xakame ruugaysay, ayuu feyga hore kaga safnaa.

Faruhuu ku sii taagnaa. Way ka qabsatay. Goobay ka laba dhacayso, oo dhafan-dhaafkeedu hadheeyay, oo uu kuusha iskaga gooyo, in Ilaah joojiyo, ayuu jantay.

Way se ku fool adkaatay. Caynkaa loo jiiday. Waa laga jimcin waayay. Jiq bay ku noq-otay.

~~Iona umul iyo~~

Isna umal iyo aamus buu ka qaaday. Saab-  
-leyda, ayay yu'ashadii is-gunuday. Meel baas  
bay yuurursatay. Jiif iyo joogba way u diiday.  
Nebdigay is-galuubtay. Jeel bay ku kala mal-  
-mashay.

In toobin lagu ilaaway, ayay isagana la  
ahayd. Qalax baa ku tikaaraysnaa. Bil 'calaa-  
-xaaliya, ayuu la waalwaanayay.

Tii kale bilawgeedii ayaa se loo faraj-  
-aday. Ayaantu sugaayay baa timi. Garabihiisii  
baa laga kacay. Qoofalkii baa laga gooyay.  
Carrabkiisii baa loo qaaday. Wuxuu doonayuu  
helay. Naar baa laga horay.

Loo mana mi'in. Dayuuradaaba samada ugu  
ceelal-yooday, oo daruuraha ugu daatay. Madaa-  
-fiic baa ugu heestay. 'Amikaarraa' ku durduur-  
-ay.

Afkaa loo saaray. Duufan iyo deegaanyo  
xiina baa lagu gadh-qabtay. Loo ma kala hanb-  
-eyn. 'Hoo biyoo, hoyo' iyo tii Walwaaleedna  
loogu qaad.

Cirkaa hoos loogu soo dhirbaaxay. Habaar  
baa lagu soo af-rogay. Dhamac baa laga waraab-  
-iyay. Dhuxulla waa lagu rakaaday. \*

Isna 'xiix' muu odhan. Qudh-qudhuu ku taag-  
-ay. Qanjahuu iska taabtay. Sidii gafanaha ayuu  
uga soo go'ay. Malookihii, sangaalihii, iyo hii-  
-hiilihii oo is wataa ka soo dhacay. Sankuu ka  
keenay.

Ina rag bay is-arkeen. Iagaintuna intii  
nabada loo fadhiyay, ayay fududayd. Laga yimi  
is-muujiintii. Magliyaa lagu looltamay. Dab qax-  
-may guradii baa lagu laacadamay. Waa lays  
biya dhiijiyay. (d)

" Dumar jimiciyo  
Jaceylkoodiyo  
jalbutayntay  
ka jawaabaan

Ragna jixarkiyo  
jacdi gaadhiyo  
jirabkiisuu  
jab-ka-kiilaa

Anna jedentiyo

" Anna jedentiyo  
 aan jiciiraha  
 kuu yar jeexee "

" Jibin-dhabatiyo  
 naar jaxiima a'  
 Anoo jaahila  
 saw juq maan edhan. "

" Jalab-hadhisada  
 jaf-jaf-laysiyo  
 rasaas jawloo  
 jirfanaysiyo  
 jar-jar iyo gumuc  
 yaa judhii hore  
 "Belo jagacliyo  
 baaruud jinawaad  
 gacal, jamataye »

« doobi jamaloon  
 shay la jaadiba  
 adduunyada jirin  
 oo jaliilada  
 oo jil-jila dheer »

« jinigiisuna »

«Ja'da weynee  
Aarku joogiyo  
Jarmal uu dego »

« iyo alab-jaan  
okhli jaawa a'  
oo Jabaan iyo  
jaaha waaberi  
laga soo jaray  
oo la jiray baa »

« jibin huguntiyo  
jarar liicoo  
isku soo jabay  
juume aan gu'ia,  
jeer lagu dari ! »  
Iigu jaaqdo ,

« Gogi jeertuu  
Jeega hawdluhu  
ka jibaadoo ,  
onkod joofloo  
Loolka jiidhoo  
jabadkiisaba  
jaaj ku qaadu »  
Jugle-wiifluhu

"Jugle-wiifluhu  
soo jimbacayoo "

«Jana dagataad  
jilbahaa dhigi  
ood jalbeebane, »

« gadhoodh jimidh-laad  
ilaa jiqilkiyo  
daan-jiriidyada  
ku juqaaliye, »

« raxmad jiiftiyo  
jeegaan malabaad  
kor u jiidiye, »

« Jir-jir-geelow  
isu-jeedada  
kala jeediyo  
dalba-juuqaha  
soo jikaaroo  
sidi jaarriyo  
neef jaguugoo  
jarco loo tumay  
soo jartaalee,  
joofka soo legad »  
~~jidka soo naug, »~~



<"jidka soo nuug,">  
 Jirda-gooyaa  
 Iigu jookh lulay. "

" Xer jibootiyo  
 Baar-cas jaan-dheer  
 cada jawhara  
 'jao' ka siisiyo  
 Wad jalaadoo  
 aad jir mooduu  
 soo jarmaadshoo  
 Jeenya gaabkaa  
 intuu jimicsaday  
 igu yidhi jiib "

<"Jalaq-sane wiil,  
 jaan dhanaanoo  
 lagu jeel baxo  
 jab-dhan iyo daran,  
 afku-jalam aan  
 weli jaamidin,  
 'Hoo', jaleelada  
 Jiinka loo maray!"> ayaa Colhayana

laga guntay.

~~Ceebi se kamay raacin. Jaahlisu muu guban.  
 Habaar loo ma dhigin wadnaha. Baraq nugaylla,  
 hooyadiiba, ku ma habin.~~



Ceebi se kamay raacin. Muu guban jaah-  
-iisu. Habaarra loo ma dhigin wadnaha. Hooya-  
-diiba, baraq nugeyl kumay habin.

"Magacaa ha jiro", "Ha ka hadhin filkaa"  
iyo "Waaqan lagugu wiirsan, weligaa" ayaa  
gundhig ducadeeda u ahaydoo, carrabkeedu laas-  
-imay.

Maalintuu taftaada ka baxay, ee uu xagga  
geeliyo xera gaasha u meerayna, "Hooyo, rag  
hortii, ha caban", ayuu ahaa ballankay, ku  
sii adkaysay.

Dhegtay kaga hubsatay. Niyadday ugu sii  
gunuday. Sahay bay uga dhigtay. Wayna ugu sii  
nabaadiina xidhay.

Ardaaguu ka aflaxay, iyo kuu qalin-qoy-  
-anaha ka noqdayna, wax badan kumay kala tag-  
-anayn. Bartuu macallinkiisii koobaad ugu  
simay ayuun baa looga sii qaaday.

Markan se barayaal doora, oo aabe waal-  
-ida leh, oo walaalo ka waa-weyn leh, oo  
nolol geeddiya iyo dhaqan ku talaalanba leh,  
ayuu yeeshay.

Intuba se, in 'calool adayg Ilaah, weh-  
-elkii yahay' kumay kala baydhin.

Habeenkiyo maalintana, xaraf ka duwan  
koodaa kamuu maqal. La af bay ahaayeen. Gabalkii  
duma iyo waagii guduutaba, "Naftu inay marmun  
baxayso," ayuu ka hayay.

So rogashadana meel kaloo fog kamuu keen-  
-in. Macallimiintiisaa ayuu arooray. Kamuu baydhin.  
Wuu ku banaanaaday.

Cidla iyo ciirsi la'na laga ma helin.  
Liig gooni u saydhmay, muu ahayn. Keligii, oo  
cadoo, madowna lagu ma gooli-baadhayn.

Rag buu wax la qabay. Xiniinyaa lala  
garab joogay. Diliinta hore, 'shig-shinkuu' kaga  
safnaana, shig-shin, kama waran kululayn.

Saajin 'miijihii' xaasawda lahaa iyo  
geed-labkii shaarubaha qallafsanaa, baa u ahaa  
taliye.

Nin door isku muusanaaba, iyo rag, dhaaw-

-acooda ku hilba diriruu, colhaye, la caana  
dhamay. Nolol iyo geeriba, way u gudboonaayeen.  
Xabadaa walaalaysay. Naf-qaybsi bay lahaayeen.

Intaa iyo in lagu daray, ayuu Golhayana,  
ku cad-goostay. Gacan buu ku ciil baxay. Marag  
aan la deedafeyn karinna way lahayd.

Goob-joogaheedii, cagida taagnaa ayaa xayl  
ah. Ragay 'furinta' ku wada jireenna, ma tirmin.  
Xabaalla tusbax go'ay, kumay wada noqon. Xant-  
-oobo, qurus gablamahan adduun ugu laaban yah-  
-ay, oo aanay weli toodii gelin, baa ka sii  
jooga.

Xaaji Warsame-ba waa rageedii. Inaga mana  
dheera. Wuu ina maqlayaa. Shirkiyo Geeduuba  
fadhiyaa.

### III

" Maantaan garanayaa, oo naf la gooyaa,  
Muslin iyo dhiigii daayoo, kolay gaal cad ku  
tahay, wax lagu mana-sheegto iyo wax ninna  
sed bursiinyo, looga dhigo maaha.

" Rag se dagaal isugu yimi, baannu  
markaa ahayn.laysu ma tudhayn.Teella kalana  
laysu ma dhiganayn.

Taayadana, Ilaah baa hayay.Colhayaa se  
'kaan-dharka' shig-shinkaan ka ahaa lagu gal-  
-aday.

Eebbe naxariistiisii ha ka waraabiye, ee,  
intii naga Alleysatay, baa wuxuu galo iyo wuxuu  
gude ogsocnayd,

Intaydii garabkiisa, colaadii kaga soo  
doogtay, baa siduu noogu gedfanaa, aad u garan-  
-ayna.

Gaashaan biruu noo ahaa.Halista u weyn,  
ayuu nagaga beegnaa.Babannaduu naga aamusiiin  
jiray.

Gacan miigan, oo nabarkeedu miisaaman  
yahay, ayuu lahaa.Hoodana wuu ku darsaday.Aad  
buu sayn-dheerihiiisa ugu kalsoonaa.Anana isagiyo  
dhugtiisaba aaminkaannu ku qabnay.

Bir-daaqeen, ayuu noo ahaa. Cadawgana, laf dh-  
-uun geshay, wuu kaga darraa," ayuu waaya-  
-waayanta, Xaaji Warsame ku ballaysimay.

Galab Isniineed ayay ahayd. Gol-castaa  
laga hadhsanayay. Damal hadhaca, yaa la hoos  
fadhiyay. Faaja-faajiyo, faallo guud baa lays  
kaga jirey.

Welina lama furin shirkii. Toddobaad  
kalaaba dib loo dhigay. Farina, weli kama  
qodnayn.

Ergooyinkii, baan isu soo dhammaan.  
Dar miisaan leh baa maqnaa. Ardaayaan soo xe-  
-roon. Aagag baa la tebayay.

Intii se muddaysigii horeeyay, ku soo  
xaadirtay baa ku gacan geshay. Taag-taagna  
baa, laysma duudsiyee, meesha ku dishay. Way  
ku jac-tadeen.

Daamankaa ku dheeraaday. Dhabarkiyo  
dhafoorkii baa ku daalay. Margiyadii baa ku  
suuqmay. Way ku curqeen.



"Wakhtiguna fara-badanuu ku noqday. Farr-aariyo faraqyo dhaadheer buu ku yeeshay. Way ka dhammaan waayeen.

Sidaa weeyee, hadaba, firaaq iyo faal-aal badan baa la haystay. Waa layska sheekay-sanayay.

"Wax la yidhi" iyo "Hebelow, maxaad tidhidaa" ka yeedhaysay. Raxdaa lagu hayay.

"Ilaahay denbigeeda, ha ka dhaafo, aakhiro. Wax dhaaxuu se Colhaye, inan-qalad (maahu-daara', oo aan wax oggeynoo, 'Biri-gaan' caga le, ka soo daba qoor-diinlaynaya, oo is-dhariijinayoo, sidaa wax noogu soo af-uufaya, uu qun-yar bidixda uga haaneeday.

Kamuu waali jirin. Wuu kala bogan jiray. Hagoogta intuu ku soo xereeyo, oo uu ka-hore ku dherero, ka-danbana ku baabi'iyoo, ayuu aashii keebka u soo luudin jirey.

Nimuu sidaa ugu habsadayna, Ilaah bixiya, ayuu lahaa. Isagu se nolol ugu muu talin jirin."

" Colhayoo 'qac' ku siiyayoo, "Kayoh!  
 Aabahay, mar mooyee, mar labaad, ma toogan!"  
 kaga soo qashar tuuray, oo ay goonyahana,  
 "Kaaga marag!" iyo "Kuma go'do!" ka yeedhayso,  
 Alla magane, maxaan u soo joogay!

"Dagaalba ee, hadii si loo dayo, waa  
 uun legdintii afarta geela lagu boobi jirey,  
 oo si kale loo rogtay. Xagal-daaca yaroo laysla  
 rakaabsaday, ayay 'warqaqda' weyni ku jirtaa.

Tumaatida Colhayana, tabnigaasay,  
 raggaannu is-haynay ku ahayd. Way ku nitaakhmi  
 jireen. Anana waannu la hiishan jirtay.

Jiidda 'balawdiyo', booddo libaaxda  
 hadaannu ku helana, 'Jaajku' ka hadal muu  
 lahayn. Looma labayn jirin. Alle wuxuu ka qayb-  
 -shaba, weerarkaa lagu gaacin jirey, "ayuu  
 tibaaxdii, Xaaji Warsame, ku yar hejiyay.

Wejiguu uruuriyay. Hanqalkuu la kala  
 toosay. Indhahana kor buu u cilaalay.

Wuu hammiyay. Xaggiyo shalay buu isu  
 jinbacay. Gabalkuu ka haybsaday. Wehella gadhk-  
 -iisii xidaysnaa, ayuu dhigtay.



Gacanta middig iyo maah-salaaxuu kula sii sheekaystay.

Nabdiguu ka sii bixitimay. Dibuu maalmihii u sii guray. Kaynaankana wuu ku sii tiigaalay.

Dagaalkii caalamiga ahaa iyo safayn-  
-kii ayuu isa sii dhex taagay. Cabaar buu cin-  
-diga ka daawaday. Indhuhuu ka buuxsaday.

Yidhiyoo, kolkaa yidhi: "Seban aan yareyn baa ka soo meeray. Anse weli, waa igu sidaa. Caad iga ma saarra. Cayaan bay igu muuq-  
-ataa.

Goobuhuna isku ma jiraan. Baadi-sooc bay kala leeyihiin. Tii 'Xawaaraley' la baxday-  
-ba, mid bay ahayd.

Magac baa ka hadhay. Khamiis dhalad bay ahayd. Lama seexan habeenimadii. Waa la goob-yaalayay.

'Birgaydh' xula, oo si xag-jirta, duulimaad loogu habeeyay, baannu ka tirsanayn.

"Carbis gaara, ayaannu ka soo baxnay. Cartii baa nagu taalay. Rag la sharribayo, ayaannu ahayn."

"Anse taa, waa la ii weheliyay. Tu-kalaa ii dheerayd. Sac baa raafka igu hayay."

"Shig-shinkaba waayahaasaan tirsaday. Saa jinnimadaa ugu cusbayd. Taliye-nimadayduna weli may bireysnayn. Balki bay ku jirtay."

"Iyadana badbaadinta ragayгаа, igaga xanaf kululayd. Way igu taallay. Wadnahana, sidaasay iigaga mudnayd."

"Biciidkii 'burka cawska ah, iyo meesha biyaha le, isla doonayay' ayaan, si kolka loo dayo, sal-salaabayay. Khasaaraha ugu yar, iyo guusha ugu ballaadhan, inaan isla-helaan ku taamayay."

"Iyaduna, Rabbi, rag, iyo habeen-dh-aladnimadayda, ayay ku xidhnayd. 'Gubadkaan, gubi-doono' iyo waagiyo guduudkiisay, weli ku laalayd. Gacan uur ku jirtay ahayd. Fool."

bay la maqnayd. Tay-noqonna, Weynahaa xugmi-geeda lahaa."

"Waxba se, yaanan hadal idinku daalin-ine, kolkuu Bari ka galac yidhi baannu kala ayaansanay. Galkaannu uga siibnay. Foodana, difaacii koobaad, ee cadawgaannu ku diirray."

"Gelin ayaannu ku sii baal-baallay. Iyaguna, noo may habran. Sutiday noo qabteen. Rasaas aad saymo roob mooddo, ayay sidaa noogu hor gooyeen. Waannu mari-waynay."

"Gooray saawa-saawahaa tahay, ooy naga sirgacan tahay, ayay," Cadkayga-ley!" iyo " Colhayow mood!", bogox igaga soo duushay."

"Babankii nagu dab-xidhay, tacshiradda, iyo habaar-qabahaannu madaxaba, kor uga qaadi weynay, oo aamusa, ayaa xigtay!"

"Anana waaba, intaannu sugaynay! Way noo dagatay. Fakaagaa yar baa nagu filaaday. Namay seegin. Horaannu ugu sii dhirbaaxnay."

"E

" Kumaanaan hurgobin. Ilaahna, nagu muu xilin. Dhoon jabtuu nooga dhigay. Waannu ka xarraga qaadanay."

" Hibaduna, Colhayay, u saarrayd. Milga-deediyo mudnaanteedaba, isagaa lahaa. Maal-intiisii bay ahayd."

" Riddo toosanoo, galaw-taabada, ayuu ku dhaatay. Gacantiisuu dhunkaday. Hengeluu ku dhigay. Ragba, subaxaasuu, shiish, ugu quusa-  
gooyay. Af-cas ayuu kaga waraabiyay."

" Nimuu fuliyana, Ridihi Birigaankaa u horeeyay. Salaantiyo halkaa sujuudda la dh-  
-iguu, kaga nabay. Sidii maskuu, ka dilay mad-  
-axa."

" Labadiisii Gacan-yarana, waxba kamay sii danbayn. La kal bay ahaayeen. Way kaadaba fuleen."

" Feylkana, Colhayaa ugu jirey. Loogu ma tegin. Saddexdaba gacantiisaa lagu sabab-  
-ay. Way ku siibatay."

" Qorigay ku dhinteen, ayay saddex-  
 -duba, hareerhiisa, ka caloola cadaayeen.  
 Hedoodaa waday. Dheecaankoodaa meesha yaalay.  
 Colhayena, Alifkii u horeeyay, inuu iyaga ku  
 qaataa qorrayd," intuu Xaaji Warsame, shaarubta  
 ku miigay, ayuu kolkiiba raaciyay, "Waxa se god-  
 -ankii ku go'ay, ee gignaa riyo may ahayn."

" Bag bay abaayeen. Farahana baruuro  
 kumay haysan. Meel kalana may da'ayn. Anafayba  
 u soo qoordiiteen. Maalmahoodana way lahaayeen."

" Taa se, Colhaye, loo ma sheegayn.  
 'Kul-yoon' ciid inaanay ahayn, aad buu u ogaa.  
 Looga ma war roonayn. Cidlana kamuu bawsan.  
 Cayaayir kalana kumuu helin. Xabad iyo xanuun-  
 -keed ayuu ku bartay. Qiime saayiday, Ilaahay  
 hortii, Isagiyo annagaba nagu soo gashay."

Shib qalaan-qaleed, ayaa damalkiina  
 ka soo hadhay. Aamuskaa la laasimay. Dibna kal-  
 -aba, shakaal baa dhuyucay. Cukaaroo dhanna  
 Xaaji Warsamaa loo dhiibay. Isaguna codkiisii  
 xabeebta lahaa, ayuu ku maansheeyay. Waayaale  
 godladay iyo geddiisii dheh.

" Anse laba aabudhay nagu dhufteen baa weli, ii sii cad!Wuu igu dhigan yahay.Dheg-ahaygana, al'aankaa aynnu joogno, 'dhar-jacдии' naga yeedhay, baa sidii ugu ciyaysa!"

"Way noo baqa-beenleeyeen.Anana iska maanaan garan.Run baannu ka moodnay."

"Wararacadii horaa, na hodday.Goob-tuna, taannu raga kaga boolaysanay, Colhayana uu ku xaraar butaystay, waxba kamay ood rognayn.Ku laba, ayay ahayd."

"Dagaalla, la hubsayoo, Ina-gelinba-cayn, ayuu isugu biyo shubtay.Dhili-dhilida sideeda inuu u dhaqmo, iyo dhinacyaynta ma daayo.Ceebtiina maaha.Caadkii weeyaan.Waana caadadiiye, dhankoodii buu u dhacay!"

" Nala hele!Aadna way noogu ciil-cunsanaayeen.'Yay ka wadeeneey?' bay nagula soo qamaameen.Way nagu boobeen.Birtay naga asleen."

"Taayaduna, saawiraan af lahayn iyo dhilis laga inaabsaday, may ahayn.Dagaal baannu u tusaalaysanay."



baannu u tumaalaysanay. Iyaguna, horaannu u oggeynoo, xidiid kumay dahaadhnayn."

"Anana wasiisi baannu ahayn. Waxba maanaan dhawranayn. Dhiigayaga, inaannu dhiig ku darro, ayuun bay noogu go'nayd. Nooga may danbayn. Axankayagaannu weynaysanaynay. Wayna naga dhammayd. Mitid soo quturtay, oo muusanow dirirayaannu ahayn."

"Namay mahadin. Waannu u dacarraynay. Mawdkana waa loo sinaa. Nagu muu keliyaysanoo, xaggayagoo qudha, qori ugu ma dhicin. Xaggoodna afku kumuu qalocan. Sawa iyo sida farahaasaannu u ahayn. Namuu kala jeclayn. Labadayada dhinacba wuu ka haagay."

"Bun tirsi bay se ahayd. Hal-dheeri-guna, muran kama jooginoo, dhankooduu isu buriyay. Iyagay maalintaa, is-ahaayeen. Saf-kooda, ayuu ka soo jeeday. Ia walaal buu ahaa."

"Hadalla godan iyo illbuu leeyahay. Runtuu ku gudhaa. Ina ragna, libintiisa lama gado. Miki-mikina, maalintuu kaa sido laga ma



geliyo. Waa loo hanneeyaa."

"Anana dharaartaa kaga maanaan masuugin. Markhaati, milad leh, baannu uga ahayn. Indh-ahayagoo shana, inay nagala hoydeen, ayaannu u furay. Iyaguma, qiraal bay nooga hayeen."

"Deeq se u maanaan siin. Baadina kumay raacin. Gaade, ayay ku goosteen. Sulub, bay ku xabaadheen. Dhac iyo dhabar-garaacna, way kula gurya-tageen."

"Anana xaq-laheedii baannu ahayn. Yaddoodana waannu ku ogayn. Uga maanaan se hadhin. Qaan, aannu ku daba joognay ahayd. Arag iyo doonashaa naga dhexaysay. Waannu ku daaq-sanaynay."

"Maqnaanshaheedana xanuun nagaga ma weynayn. Kurbo iyo kaar adduun buu nagu hayay. Gambadii haweenkuu noo xidhay. Habeen gama'-lina wuu nooga dhaartay.

"Rag Allow axdigii  
Miyaan loo adimayn?"

" Ikhyaartii amranayd  
 Iyo Awliyaduu  
 kolkuu oomo dagaal  
 gacantooda irmaan  
 ku aroori jiree  
 idankiisa lahaa  
 ma ragii arjumee  
 ka aslaa weli nool  
 oo la eeganayaa? "

"Aanadiinnu weheey  
 war ma Eebe hortii  
 ajar loola baxaa?  
 Ma ku aakhiradaa?  
 Ma miduu abnaqeed  
 ka inaabsadayoo  
 awalkiiba lahaa  
 Allow yaa anbiyaa?"

"Aanadiinnu ragow  
 ma uneexadi Hawd  
 nin unuunufayaa  
 ayda uu ka helee  
 ku salaamay afkee  
 ilkihiisa gashee  
 gawsku aabudhay baa? "

" Ubaxiinnu waryaa  
 ma ugaadhi bankee  
 ninkkii eebo sitaa  
 ku aguugi jiraa?  
 Ma ugraan goroyoo  
 war aroori banaan  
 udubkeedu yahoo  
 dhaad aboodi dugaal  
 ugu eeran miyaa? "

"Agasheey!Agasheey!  
 Amakaag iyo yaab  
 tani was ugubeey!"

"Utuntiinnu waryaa  
 ma abaal la gadaa?  
 Ma amaana luntaa?  
 Ma isniin galbataa?"

"Aabihiinba la naar!  
 Aga!Waydin sidee?  
 Maxaw aamusan tiin? "

"Aar la'aan rag dhintoo  
 aad idiin sugayoo  
 ka ayaan, ka ayaan

"idin eegahayoo  
 intaa aaway leh baa  
 iilka soo gujiyee  
 nimanyow arrinkiin  
 haatan waa innagsee  
 dhegta awdo, miyaa?"

"Abidkiiba illeyn  
 dhiig afeef iyo baan  
 kuma soo ururoo  
 saanaddaa oleshoo  
 onkodaw sancanoo,  
 laf awaariyo boodh  
 olog looga dhigoo  
 iniinyaa noqotoo  
 Awawgeed la guboo  
 eeday baa dihatoo  
 oofuhuu ka dhashaa.  
 Wuuna fool adagyoo  
 anafaa dhicisoo  
 nin ku eeafa dagaal  
 ayuun baw ehelee  
 Egga waydin sidee?  
 Asalkeeda banaan  
 ma ergaa u tihiin?  
 Ma ulaa sidataan?"

"Yad miyaa inkirteen?  
Afaray iyo dood  
Ma af baad ku rabtaan?"

"Eyradiini maqnayd  
wataa soo oloshee  
maydun 'oohow' dhahdaan?  
Iman mayso hadaan  
uuro loo kicinee  
weerar maw ilataan?"

"Xawaalki Afa-gaal  
ee aloolka lahaa  
uugaan baa ka baxoo  
Ukulaa indhaweyd  
alleylki ka hugmoo  
ka argeegtamayee  
oodda maa ka rogtaan?  
Duud aroosliyo gool  
ku hagoogan ugbaad  
iyo aadanayaal  
maa u soo eridaan?"

"Arbaciinki ragoo  
gadhweynoo, odayoo  
agabtiisi wataa "

"Ardaagii fadhiyoo  
wakaa 'awda' hayee  
maw abaabul gashaan?  
Awrtanuu farowgii  
oogadooda xardhee  
aleelaa ku taxee  
laba eeftay maruun  
maa amley iyo soodh  
kula soo oradaan?  
Agaskeeda la naar  
axan mawga dhigtaan?" siduu garab-  
-kayagii banaanaaday noogu guul-guulayo, All-  
-ahayow, muxuu waagu ku galac yidhi!"

"Ragay mirtay baannu ahayn. Dibintana  
gubtaanyadeedaannu la qaniinsanayn. Way naga  
soo go'day. Iyadoo lays hor joogo inaannu kala  
soo hadhno, iyo inay hilbo nagaga darsadaanna  
nooga may dhexayn. Gam baannu u taagnayn. Shul  
ama shulla waannu u soo qaashaaranay."

"Nidar Ilaahna, sinaba inaanaan u gafin,  
ayaannu ku galay. Nagumana beenoobin. Waannu  
kaga dhabeynay. Taf-wareemashiyo sidoodii,  
dagaal tuugeysiyana, ku maanaan tahan-baabin."

" Duhur sheegan iyo qorraxdoo daahir-  
-yaa-shamisa, ayaannu u dhiganay. Iskeen  
siiyaannu nidhi. Alana nagu ma kashifin. Taa-  
-yadii buu ka yeelay."

" Hadh cad baannu ka meersanay. Noo may-  
gagan. Hadiyadna noo may siin. Shan farood iyo  
calaacal baannu kaga furanay."

"Waannu xeer marinay. U maanaan dhimin.  
Wadhida, wadhideedii baannu ku dhignay. Xabad  
baannu kula xaallay. Ciddi caaradeedna ku maan-  
-aan dhaafi. Waannu ka cad-goosanay."

(bi) " Dhicdeeda kolkay  
Sida dhoolka guyeed  
u hadhayso dhulkee  
ka dhaqaajo fuluu  
Geesi soo dhigayoo  
geeri loo dhalayee  
dhafan-dhaafka ragii  
Dhiirranow Maxamuud  
Dhammayski Cali-dhiif  
Xariir dheeriyo Gaydh "



" Dhegaleyda ragii  
 ku dharbaaxi'ogaa,  
 dhirti gaarka ahayd  
 ee la dhuun mudayee  
 lagu dhuuxay warmii  
 loola soo dhukusee,  
 isku meella dhignaa  
 dharaartii Dabin-qool,  
 in la eedo Dhamnow,  
 dhaartu saw ma ahayn?  
 Dhilistooda ragii  
 kaga dhaabay wadnaa  
 in la siiyo dhurwaa  
 dhaartu saw ma ahayn?  
 Nimanki dhababee  
 ragii Dhaadanayaal  
 dhagartooda galee  
 dhiiggu uu ku maqnaa  
 saw inay u dhintaan,  
 sidi caana dhanaan  
 ama dhay iyo xoox  
 wedka ay u dhamaan  
 ooy u sii dhadhanshaan  
 dhaartu saw ma ahayn?"

"Maantaad dhaadan kartaa "

" Afti dhiiban kartaa  
Warna dheehan kartaa!"

"Ceebti waannu dhaqnoo  
magacaagu Dhammow  
maantuu dheeman yahee  
'Dhag', g'dhehoo, 'gama' oo  
dhacadiid luxudkoo  
Rabbigeen kugu dhawr," iyo geer-  
-aar libineed, baannu kula hoyanay.

"Iyaguna huq iyo 'way' bay kala hull-  
-eeleen. Jac baa ka gaadhay. Fool-xumo adduun  
bay xantoobsadeen. Fadhaqay la sii tiiriyeen."

" Ninba se meel buu ka qabasha bartaa.  
Colhayana, 'Mishi-gaannada' cadawgiyo cabudh-  
-intoodaa, la tusay. Saami buu ku helay. Fartaa  
loogu goday. Hala-halaysigoodana, faataxaa  
loogu maray. Wuu ka booddo bartay."

"Nimankuna, intay 'Gildhi-gaannada'  
halaagan, sutida noogu hayeen, ayay ku yeesh-  
-oodba, xaggiisa ku lahaayeen. Raguu la-gudh-  
-inayo, ayay markaa ahaayeen. Xabad baa ka  
dhexaysay. Nagtuu ku hayay."

" Iyaguna dab yar may shideyn. Aafaad bay sidaa ugu soo af-rogayeen. Way la raadinayeen. Intaana hoos bay ugu dhigayeen."

" Kolkay se xarbigiyo goobtiiba ka fan-jeediyeen, ayuu isaguna la xafiiltankoodiiba ka da'-furay. Damac buu ka waayay. Dhabarkay ballaadhiyeen, ayaa gaagixiyay. Kal iyo laab ayuu uga biya-diiday. Wuu ka gaws qabsaday."

"Nabaruu 'qush' kaga siiyana, markaasaa u danbaysay. Wuu ka daystay. Gobanimuu ka xigay."

" Hadaba, rag Allow, Colhaye waa kaa. Han fog, iyo gacantaa caagan ee bir-ma-geyn-ada leh, ayuu ragba kaga tegay."

" Geesinimana, hadaad i weydiiseen, WATAA ! " ayuu Xaaji Warsame, su'aasha jaw-aabteedii ku soo ururiyay.

## IV

Cuur-weynaha se geedka ka jirriqsanayaa,  
 Colhaye, sidaa u muu hundo (geeyn. Shishena  
 u muu garanayn, Shalaydiisuba way ka maqnayd.  
 Maantiyo, il-mugeed bay ugu sinnayd. Humaag-  
 -iisa, aytiun baa u muuqday. In ka sii rogan se  
 kamuu hayn. Jiritaankeedba, wuu ka xog-la'aa.

Duq gaboobayoo, golxaale ahoo, saa u soo  
 godan, oo tusbar Haybe ah, oo boqola intaa  
 ridaya, oo ciroole ahoo guglisu is-guray,  
 ooy saantiisu gaaban tahay, oo jeenigaa bid-  
 -ixdana yar balfiya, iyo oday reer baadiye  
 ahoo, Hawd iyo xagar haraad weyn abidkiiba  
 go'doon ku ahaa, ayaa badiba loo arkayay.

Duub-giraan-girtiisuu iskaga dhex jiray.  
 Sidii madasha loogu kulmayna, kol qudha hadal-  
 -gole la muu sare-joogsan. Dhegta, ayuum buu  
 intaa maalayay.

Kolkay u soo martay, ee uu baanisada  
 mayalkeedu u soo meeray se, kamuu nabsi  
 galabsan. Cagtuu u dhigay. Miyir buu kabiyay.

Shaydaankii buu ka naaray. Bisinkuu u qabtay.  
Shirkana, boqol iyo afar iyo tobanka, iyo  
quraanka cadadkiisa, ayuu ku nabdaadiyay.

" Xaaji Warsamow, maxfalkeenan caaridku,  
hadii Eebbahay xugmigiisa leeyahay, Safar  
iyo gudcurkoo sagaal tirsaday ayuu inoo  
furnay. Kulan kheyroo laysku waafaqo, iyo  
kii khaatumadiisu ay samaato, ayuu Shaallee  
inoo noqon."

" Biluhu se, taawilo iyo tigaad bay  
kala leeyihiin. Tabniga dhulka weeye. Sanac  
bay ku kala tagaan."

" Safarna, inta lagu yaqaan, saddex baa  
ugu sawrac ba'an. Geedi dheer, gar'aan gu'in,  
iyo ganto laalan, ayay gaar ugu sii sheeggan  
tahay. Shayga hadal la yidhina, tar iyo toox  
bay u leedahay. Goor walba se, Tiisa weeyee,  
'Casaa-wa-jalluhu' hayna siiyo kheyркеeda."  
iyo ducadaa 'ijaabada' leh, ayuu Colhaye,  
ku bireeyay arartii.

" Aamiin " baa la wada yidhi. Isaguna  
~~ka sii gudub. Gedel iyo gaal-gaalashaa xigay.~~  
~~Hawraar waafuu gelin, gelihii ku mayracay.~~



Isaguna ka sii gudub. Godol iyo gaal-gaalashadii baa xigtay. Hawraar waafuu gelin, golihi ku mayracay. Haasaawe gobeedna kamuu tegin.

" Waxaan maqli jiray, 'Waxaaga, wax laguugu daran'. Tanoo kale se weeyee, da'daan ahay, Ilaah baa Weyn, oo Waaxidee, shirweyne kan la ayniya, oo sidiisaa 'mashriq' iyo 'maqribba' lagaga yimi, ka qayb-galkii waa ii maalinkaa, maanta ah, oo Alle mahadii weeyaan," oo kaftan-dhable ka ah, ayuu ku soo yar hoojiyay. Haxayoo, markiiba ka socoy. Horuu uga sii jedladay.

"Magaaliyo kala-minawarkeedana, isku maanaan soo dhawaan. Waa horaan, qax xumaan-teeda, ka tashaday. Dagaalkii labaad, ee 'Cantar-naashka' ahaaba ila may soo dhaafin."

" Siyaasad iyo ashqaalkeedna, laygu-ma haleeyo. Miyi baan kaga cindanahay. Maw-aashi baan ka daba joogaa. Weysadaa iiga dhawran. Wardi baan ka haystaa," intuu afeef iyo af-gobaadsiba ka dhigtay, ayuu isagoon

hadalka tarantiisa, wax moodin, oon ku sii tiigaalin, san-gaabtana, aan soo qaban, raaciyay, "Soomaali ciidan uma maqna, ceella uma qodna. Ceelalyana, hadii Eebbahay idamk-iisa leeyahay, caaridka madashan ku xugman baa u ah."

"Madaxdii loo caleema saaray, ee siyaasadda u cilmiga lahayd baa raadir ku ah. Saraakiishii garoomaha lahayd ee dagaal iyo 'Kaarto' la dhigaba biliga loo siiyay baa ku xeeran. Culimadii 'Tuxfaha' iyo 'Min-haaj-kaba' xaafidka ku ahayd baa joogta. Waran-lahayaga kale, ee oday beeleed leh, ee milatari-caskii geela ee Gaas-dhegoole loo bixiyay lehna, daa hadalkii. Haan walba waynnu leenahay. Sodon caana-maal oo cir Alle ka dhashayna, sida ayaynu ahayn. Qoobka maynaan kala qaadin. Degel fadhi baynnu ahayn. "

"Intaabana, wanaag iyo waxtarka ay midnimadu leedahay, baa laysla sheegayay. Kol qudha, lagu ma kala-baydhin."

"Shawrkeenana u maan deyrin. Habaarra



waa ka dibed. Hadana weli, waxay ila tahay, inay xaajadeennu meel guran tahay."

" Bal se, rag Allow, sheekaba, sheeko ayay keentaaye, wax la yidhi, " Oday reer baadiye ah, oon weligii salaad ciideed, oo la tukanayo, aan 'Wajahtu' wax ka odhan, ayay 'Arrafo' isagoo safara, magaalo ugu soo gashay."

" Maxfal laysku arkay, oo ay muslimiin iidsani isugu soo baxday, ayuu ku biiray. Salaadii oognayd, iyo 'Tak-biirtii' saayid-ka ahayd, ayuu se la 'Astacajabay'. Nabar buu maankiisa la kaashaday. Wuxuu se rog-rogaba, kolkay u caad-bixi weyday, ayuu xaggiyo ninkii middigta ka xigay, isu yar dadbay. Afkuu u dhuubay. Isagoo aad u yaaban, waxna xuuraanso is leh, ayuu kolkaa yidhi, " War salaada halkay, ka xidhmi la 'dahay? "

Qosol baa jaanta la wadhay. Rabbac ayaa 'widhiida' la guray.

~~" Anna, ujeeddiyo haatan, qas odayгаа, ayaan ahay. Shirkeennu meesha, urur QABYADA ka yahay, ayaa rag Allow iga maqan!"~~  
ayuu kolkii la

" Anna, ujeeddiyo haatan, qaabadii  
odaygaa, ayaan ahay. Shirkeennu meesha uu  
QABYADA ka yahay, ayaa, rag Allow iga dedan!"  
ayuu Colhayana, kolkay kala yar degtay, ku  
soo gunaanaday.

Halk

D H E G A      D A M E E R

- - - - -      - - - - -

"Dhawaalaba naftaydani  
inkastooy dhibaysnayd  
ama lagu dhammaa jeer  
xalay bay dhukuratoo  
waxay dhaga-dhaysaba  
dhiilkeedu buuxsamay!"

"Candha beeshay dhaaxay  
isu keen dhamaagtooy  
is dhariijinaysee  
col dhacyeey mukhayntiyo  
iba dhiijinteedii  
iniqday ku dhiiqdiyo  
gadaan dhabasho iyo hawl  
dhegadhay ku keentee  
ku 'dho, leeyey sacabkii  
haaneedka loo dhigay  
dhursugaayayow hoo..." Ayuun Sigad  
lingaxa kaga gooyey sheekada.

Ma-kadmow Keryse ikhyaar iyo Mujaahidiin,  
Rabbi iyo rag yaqaankii golxada dheeraa,  
ee Cabdi 'Wayd' ku caana maalayba leh, baa

.../4

hareeraha kaga gedaanaa. Xalad bay ku dhegaysanayeen.

Dhulkuna kala can-dhabane, xaruntii dhaawaca ee raac-danbeedkiyo kaynta shareeran xudunteeda ku liqaansanayd, ayey Jabhad-iintu ku fiidsanayeen. Ciidda geed-labkeediyi suubaantii guduudnayd baa u goglanayd. Xerada garabkeeda woqooyi bay ka cawlaayeen. Hurdaa loo gaalgaashay.

Goluhuna laba, muu tawanaynin. Sheeka taabuda iyo kaftan aan turxaan lahaynba Allaa ku xawilay. Hadal, aan hadal ka dheerayn oo hoos loo wadaagaa ka xeerayd.

Habeen weeye. Hawd baa la joogaa...iyo hoy qalqalo. Galoolkaa ka foodhyaya. Dhimbishaa ka jawle. Geel baa ka olalaya. Nirгаа ka yuusaya. Haleelo irmaan baa ka reemaysa. Boodaan baa ka hugmaysa. Waraabaa ka giile. Guumays baa ka barooranaysa. Wax ka 'dhaw' leh aleen. Dacawadaase ugu daran.

Alaylkuba dunyoo, afkaa iskumay darin.  
Harawaati baa laga soo wadnay.

"Igu dawladaa sare  
igu daacaddiyo Kamar  
in digreeto ii timi  
aan ku diirsadoo tidhi  
Daya Cali ha loo diro  
duunyada ha raacdee!"

"Dawladi il dheeraa!  
Dadaka kala taqaanee!"

"Duunkayga hoosaa  
daahir loogu muujoo  
dareenkayga xalan bay  
Deniyadu ogaadeen!"

"Anigay i dayatoo  
deylo naylaheediyo  
waxaraha dir Cawleed  
iyo maqasha diibka le  
anigaa u dooyo ah  
dumadayda weeyaan!"

"Dar Ilaahay caawaba  
anigaa duleedkiyo  
daajinaaya araraha!"

"Dayaxaan ku mayraci!"

"Sida loo duduuciyo  
sida loo dabaalaba  
digrii bean u haystaa!"

"Dalandaliso waa Ani!"

"Haye, dee an didiyee, daba huwan!  
An dabayla raacshee, daba huwan!  
Dabadeed u yeedhee, daba huwan! Ayey  
heblaayo ku maakhadaysay.

Kal iyo laab, gacaladeed oo ugu rixisay  
baa, iyana ka dhinac qaadatay. Hambalyo  
diiran oo madda leh bay u hibaysay. Jeenigana,  
dhegtiyo dhabankay la tiigsatay. Mashxarad  
isku tumatay, oo teer iyo idaafayta laga  
maqlay bay ugu sidi, sidilaysay. Dabadeed  
waray tidhi:

"Dubku kaama hoodhoo  
afku kuma daboolmoo  
dalqadana ha waayine  
waa lagu duceeyoo  
digri iyo ilhaam iyo  
waxyi baa ku soo degay  
Khayrooy dushaadee  
doodaad lahayd iyo  
wacdigi dalaysnaa  
mar labaad dalaandali  
demanaha far waaweyn  
iyo deel la hoos dhabay  
ugu sheeg daliilkoo  
xarakada durkeediyo  
daabaca u kala saar  
laan deyr u kala mari  
oo daahanteadiyo  
dalba-juuqahaagaba  
cilmi baa ku duugane  
dedka iyo af-saarkiyo  
uga diir xijaabkoo  
waa duul haraadane  
dacda aan ku soo hor  
adna uga dul geeraar!"



"Haye, dee ha daabtee, daba huwan!  
 Badawiga durduursii, daba huwan!  
 Doobkaha u dhiib dhiib, daba huwan!"

Farxad bay ilka jicirsanna la kala bada-  
 tay. Raq-raqdii baa ka dhammaatay. Way isu  
 bogtay. Ciddi iyo gujay isku madhisay.  
 Daba dheeroo, bulku intaa le'eg yahay, oo  
 ay waraarido, iyo sino ay waydhaamisaa laga  
 soo taagay.

"Ma lay dirayeey, ma lay dirayeey  
 ma lay diray, daaqu waa yaabe  
 ma lay diray, heeS, daf iyo luuq!"

"Ma daakirayeey, ma daakiray  
 Dagooy sidi Aw, ma daakiray  
 ma daakiray, goor dad jiifsaday!"

Siday ugu Caliya, Caliyeynaysay, ee ay kolla:

"Dagaar baa biyawdoo  
 dardarsaa ka joogoo  
 doogaa ka heesoo  
 diinkii ka soo galay  
 dooxooyinkeedii  
 wuxu yidhi 'Dulow, hoos  
 iyo waa daf, iyo midhiq!  
 Danankiyo rakaadiyo

rahu doobta kama dhimo!'

Duqu waa abwaan show!" Ugu xaree-  
dinaysay ayey Dayo xabeebsatay.

Mujaahidiintuse, darcorigeedaa, dan iyo  
heelo-toona kamay lahayn. Hansalkaba, kamay  
qaadin. Way ka sii jeedeen. Sigad, mun bay  
dhegaha u raaricinayeen.

## II

"Dhalmaanyada ladhkeediyo  
dhugucdada habaar baa  
show uurka dhaanshee  
dhicisaye, alhuumadu  
dhabatay u yeedhoo  
'Cidi idinma dhaantee  
dhulku durug hortinaa  
dharaartii la yidhiyeey  
maalmaha dhabeesha a'  
Rabbi kaa dhex saar' tidhi!"

"Af dhabeen dhabtooy, belo  
iyo baas ku dholoshoo  
'Caku!' tidhi, 'dhiskeeniyo  
dhudaheenna ciiddii

looga qaaday dhoobada!"

"Dharaqaan ku hadashoo  
ku dhawaaqday yaahuu!"

"Anna udub dhexaadkii  
sidaa loogu dherershiyo  
igu sheegtay dhidib jaan!"

"Dhaban-daadsaneey tidhi  
'dheegayga Qodaxoow  
intii aad ku dhaabnayd  
maxaa geesi dhaatiyo  
naf dhammayse kala tegay!"

"Dhiidhiida mooyee  
tiro soddon diraac dheer  
iyo dhumuc ku saayida  
ayuun baad dhilowyan  
halkaan dhaadka saaraba  
adiguna dhigaysee  
bal maxaa dhadhaabtiyo  
'Dhakab' igaga kaa dhigay?!"

"Anna idhi, 'dhurwaa ku cun!  
Afku yuu ku dheeraan

ama kaa iskuba dhegin  
carrabkuna dhar or noqon  
ama kaaba soo dhicin!"

"Ma dhamide bal aashaa!"

"Malaa waad is dhaaftoo  
dhiidhiga colaadiyo  
liifka caara-dhuubtiyo  
hubka laba dhacaayee  
Dhidar lagu gilgilayee  
'Dhugatooy, godkaagii  
ku dharsarsan mayside  
intaan dhooshke waagii  
soo dhicin dhalaalea'  
ka dhaqaaji, iyo yidhi  
'dhul kaleeto deydayo'.  
Yaad ku dhega barjawdoo  
dhafan-dhaafke gumucaa  
qiyaastii wax kuu dhimay?!"

"Haw noqon dhawaaqaa  
dhayal iyo fudayd iyo  
dhasalaalaq haw odhan!"

"Ina Dhagaxse hadalkii  
 dhinac buu ka marayoo  
 dhaw-dhawdu uma dhicin!"

"Caduur bay hiddiyo dhacan  
 dhukenida wadaagaan  
 dhalenkuna ma doorsamo!"

"Dhoontii aboorkiyo  
 dhegihi dundumadeey  
 guumaystu dhaxashee  
 gungumuhu dharkaw tolay  
 dhieluhuna malaasaan  
 afka show u dhuuboo  
 ku dhuraayey waanada!"

"Dhaxan legu baneeyeeey  
 igu soo dhaharatoo  
 ii raacday dheeraad!"

"Igu tidhi, 'dhul-jiifow  
 haddaan dhooxanaa jeer  
 ama dhoy la'aan jirey  
 biyo kama dhibcaankiyo  
 barti ay u dhimatee  
 dhaabadi ku gorortiyoo  
 hadduun baan dhabtii helay!"

"Dhiilada i baratiyo  
dhaawaca i laasimay  
dhibkan faraqe ii sudhan  
iyo dhawrtu waa adi!!"

"Cirkan layga dhababee  
an ka waayey dhadad~~ka~~  
naski uu ka dhoofee  
dhaqayobay waa adi!!"

"Dhabcaalkii wanaagoow  
dhufayskii xumaantow  
cunsur dhooban baad tahay!!"

"Anse dhalad xariiriyo  
dhooloosin baan ahay  
dheehaygu waa luul  
dhuuxaygu waa dahab!"

"Haddii lays dhudhumiyana  
faladh iyo lag iyo dhaad  
far dhexaan ku dheerahay!"

"Balse wayla dhacantee  
aan soo dhaweeyoo  
runta aan ku dhiijee

ama tayda lagu dhacan  
oo dhoobi lay noqoy  
ama dhiisha kala jaray!"

"Anna idhi, 'Dhur-lacy, yaa  
dhalanteedka kugu horay  
iyo dhaanka shaydaan?!'"

"Ha ku dhihin lehaydaa!"

"Cadhaday 'dheg' tidhiyuu  
dhiirtaxanyadeedii  
dhifsadee halbawluhu  
intaan baal dhaqaaqiyo  
dhaayaha la kala furin  
dhuumaha ku nuugee  
dhakhsa ula gadoomee  
dhegahana la sii nabay  
wadnuhuna u dhabaqsaday  
sida dhayda xoolaha  
yay la dheelimootoo  
dhamac baysku oogtoo  
dhinbiil baa ka 'jagac' tidhi!"

"Aniguna ma dhacmine  
dhididkaan shuxaayee



aan 'dhibiq, tif' laa baan  
 dharku waa halkiisee  
 dhoobada ku qooyoo  
 dhuxul baan ku joogsaday!"

"Dhega-meran gadoodoo  
 dhoombirkeeda rog too  
 dhiriftaa, illeen halis!"

"Side dhuxun-ku-reebkay  
 isku soo dhegtooy, tidhi  
 'dib insaan dharkaynow  
 wax inoo dhex marin bay  
 intaa dhaari iga tahay!!!"

"'Nolol, iyo dhul' iyo idhi  
 'dhalashaan wadaagnaa  
 dhiig baysku keen xidha!!!"

"'Wada-dhalashadii' tidhi  
 'kala dhimasho ku ilaw  
 dhiig bayna kala guri!!!"

"'Inta kale iskaba dhaaf  
 kala dheegmi maayee  
 dhulka! idhi 'sideed odhan!!!"

'Isku dhawran maynoo  
 ood inoo dhexaysiyo  
 wada ool ka dhimayoo  
 labadiisa dhinac baa  
 dhawaaq laysla gaadhaa!'

'Waa dhabar sakaaroo  
 dhawr qaadi maayoo  
 dhudhun weeye Geeskuye  
 an ku kala dhaqaaqnee  
 la dhuyaalay kaygoo  
 dhanbalkayga qaataye  
 kaagana la dheeraw  
 dhabbedaa la sii qaad  
 buuraha la sii dhaaf  
 badda dheeliyeysee  
 dhalacyeysa, kala meer!'

'Abataqanna kula dhacan!'

'Ia huleel dhamiijada'  
 iyo tidhi, 'dhibkaagoo  
 dhikishaada la abraar  
 iyo dhuubka caydheed!!'

Anna idhi, 'Dhegeey! Shii!  
Lugtii dhaafta jeeniga<sup>1</sup>  
'dhalow' saw ma odhan jirin!!"

### III

Waase riid horaad weli. Heegaduna jiq weeyaan. Ifisaa haysata. Hilaaceedaa ka haloosiyaa. Afarta bayna-jaho iyo arlaa'-igana waa looga jiibinayaa. Geed walbaba in Af-jeex lala hoos taagan yehay...baa la moodaa. Iba hadal dhexdoodba Sumuc baa "Foodho! Yaa car soo gala!"<sup>1</sup> Kaga hugmaya. Fartiyo keebkaa heshiisa.

Fiintiina, fadhi ka dhimay. Babisaa loo riday. Naftii baa isugu timi. Bidhbidhisea loo tebiyey. Cabsi baa boortay. Hadhkeedeey ka didaysaa. Fur iyo xanjaa lagu gooyey. Dheglow 'salag! tidhi. Waraaqii baa ka dhammaaday. Wadnuhuna afkuu yimi.

---

1. Waa maansada Fido ee Hadraawi.

Waxba kuma noola. Sas bay qaaday. Sayn  
dheere, kolkuu onkodaba, siday hoogtadu,  
"lays gel!" Iyo "way dhacaysaa!" ugu  
'hayaay' lahayd, ayey surbacaaday. Jidiin-  
kii baa qalalay. Qawlaladaa taradhay.  
Dhanxanaguna qolof buu yeeshey. Surmi baa  
diley. Biyo ceella, kuwa cirkaa uga dhaw.

"Waa Hawd gelgelimeede  
waa guri col joogeene,  
iyo guluf xabaadhaaya  
oo guura bahaleeya  
iyo gaade laayaane!

"Ma ogtahay, go'dooy ciidde  
xinjirtii ku gobo'leysay  
iyo dhiig guntamay, hoogto  
inuu yahay guduudkeedu!"

"Garo oo go'dooy meesha  
gadaheedu waa saase  
haddii aad ku geli weydo  
intii aad go'dooy guurto  
guurtood galbeed qabato  
orod gaanka waydaaro  
Geeskana ka googooso!"

"Ama goor walbiyo reenka  
 Fiineey, gariirkaaga  
 giiryaale-nimadaada  
 iyo gochan demi waayey,  
 galasyuusku waa ceebe  
 waa guul-darriyo hooge  
 goojada, go'dooy jooji!"

"Hengeshiyo gambada weerka  
 intii aad go'dooy laasho  
 dhexda aad gireamaysa  
 maradana gurtood muruqa  
 iyo lawga gaadhsiiso  
 ood geed adayg noqoto  
 adduun waa galgaladkaase  
 gaashaan-dhig weeyaane  
 gabo-gabo col weeyaane  
 garab-saar dab weeyaane  
 gildhi-gaan silsilad jiita  
 badh-dalool gufaacooda  
 qabar-suukahaa genaaya  
 gube iyo gantaal naara  
 iyo gaabanow qoriga  
 adiguna go'dooy, meerso!"

"Gulcubtaada soofayso!"

"Galow taabad weeyaane  
geerida walaalooba!" Ayuu galay-  
dhkuna...subaxii, saaka ahaayoo dhan, ku  
waaninayey.

Waxbase, Ilaah kagama duwin. Dal-dawan  
bay ka ahayd. Waa laga madoobeeyey. Fara  
madhan iyo faraq haawaday bay ka joogtay.

Mujaahidiintuna, iyadiyo maceedatoona,  
umay soo jeedin. Sigad bay u heelaneeyeen.  
Dhega weela oo culen bay u dhiibteen.  
Isaguna, sidii buu carrabkiisa irmaan  
ugu maalayay...

#### IV

"Naga dhabaqday sheekadu!  
Gooray dhiidi joogtoo  
ay naga dhanaan tahay  
oo calaacashaa dhawr  
iyo taagen tahay dhugo  
dhogor iyo ka eeg timo!  
Ayuu xiir dhurwaayii  
dhexdayada ka boodoo  
dhawaaq nagala hoos kacay!

'Weli, weli, dhanbaal weli  
iyo khbar kan loo dhigo  
dhegahaygu may maqal!'

'Waa dhumatiyo sarar  
iyo Dheeha daribteed!'

'Ama dhaysti Heemaal  
iyo dhuux la heensado!'

'Ama waa hunguri dhubug  
iyo dhaylo waylood!'

'Markaan sii dhadhamiyaba  
dhool baa hilasoo  
daruur dheeliyeysoo  
xereed soo dhawaysaa  
'dhash' ku odhan afkaygoo  
dhiijean biyawdaa  
gawsaha dhirbaaxdee!'

'Dharanaa! Macaanaa  
Warku dhaaya weynaa!  
Oo dheef cudoonaa!'



'Iyo dhiita-dhiitada  
qosol wuxu dhikhleeyuu  
'ii dhalatay' leeyaba!'

'Dhag-dhagtiyo washiiriga  
dhab-dhabtiyo dawarraha  
wuxu dhababaceeyaba!'

'Isku dhoon laxaadliyo  
geed dhaatay mooyee  
dhirta gaaban garabkiyo  
wuxu dheega mariyuu  
dhididkuna tawaaddiyo  
dhafoorkiisa hulan iyo  
dhabanada ka hooreba!'

'Dhaantadi ku xuurtoo  
dhaun yeedhi odaygii!'

'Dhudhumada marooriyo  
kala tage dhan-dheeradu!'

'Dhiliftana la soo ciir  
iyo dharas laleema le!'

'Salke dhigay tartiibtii  
dhabarkana ku saameel  
haan-weris dhan-xiirkuu!'

'Dhiicadana kale guray!'

'Yara dhiibi jeeniga!'

'Annagii na soo dhawr  
dhaayaha na soo sii  
dhurahana ku xedantee  
dhakadiyo bidaartoo  
yidhi 'dhoyski dabadaed'.

'Dhukan iyo War-moogow!  
Ilma Dhagax dixeedoow!  
Aan idiin dhammeeyee  
sheekada dhudeediyo  
dhabta ay ku ururtiyo  
dherageedu waa hee!  
KOLKUU DHAHAR DABAYSHADO  
DHURUQ DHEYLAHAYGAA  
DHUTIYAA DUMAASHA LEH!!!'

'Hadhow bead dhuhlaynoo  
 Soomaali dhagaceey  
 'ma dhex joogin' iyo odhan  
 'waan dhama' sanaayoo  
 warku iima dhaadhicin!'

'Dhag' ninkii ku jira iyo  
 kii yara dhakooliyo  
 kaan 'dhakaw' ka siinow!

'Dheddigiyo labadkiyo  
 dhallinyariyo waayeel  
 iyo dhoorayaashow  
 dheedheelka ma aqaan  
 dhab-darana ma qaatee!

'Dhexalkayga ruuxii  
 iigu soo dhawaadow  
 dhangagaalahaygiyo  
 arrtayda dhibidiyo  
 isku saydha dhiigga  
 ku dharjaasi doonoo  
 dhimashadu gar weeyee  
 isu dhiib aboorkoo  
 cafis dhawr haddaad tahay

hoos u dhaafi mayside  
 dhexdiisaa ku gaadoo  
 iilku dherarka waa Xays  
 iyo xarun u dhigantoo!'

'Dhulka iyo xabaashuna  
 dhalan iyo dhur iyo dhaqan  
 uma kala dhacaano!'

'Dhumuc iyo madiyo gudub  
 dhinacaad ka eegtaba  
 waysu dhaga dameeraad  
 iyo kala dhigoodii!!!'

'Intaan dhearshay faalkii  
 efartaa ma kala dhigay!  
 Dhambelaha hilaac iyo  
 dhool bari ka soo kacay  
 dhigo wada ilaysiyo,  
 jeegaan ma kaga dhigay!'

'Dhagba waa dhagteedee  
 Dheharkii labaad iyo  
 Dhagalaase waa ani!

'Hadal wuu dhammaadee  
af dhalaalka daayoo  
raad-weyn dhalaeniyo  
dhixirreey sideedii  
dhega waddan lahaadoo!'

'Orda oo intaa dhuguc  
iyo dhagac ka siisaan  
tabnigii Dhakooshiyo  
Aabe dhaan sidiisii  
dholoh-dholoh u boodoon!'

'Saxab dhaadan iyo ubax  
dhulka igu xaadhoo  
ii gureeya Dhaameel!!!'

V

"Adduunyada ninkaan dhiman  
ee dharaaro sii nool  
dhaygag baw danbeeyee  
cirkii baygu soo dhacay!!!!"

"Xaggan dhawray waa tii!  
Dib u dheeday waa kii! .

"Sidii curad dhalaanooy  
 hooyadii 'ha dheeliyin,  
 hayga dhicin!' Ku leedahay  
 dhalaalkii yaraayee  
 ishu dhawranayseen  
 dhaqaalaysanaayee  
 wadnuhuna u dhacarteen!"

"Xay dhiimayaashiyo  
 dhoomaha laxaadkee  
 dhafar qudha wadaagiyo!"

"In dareenka dhaadiyo  
 in kaloo dhadhamisoo  
 dhakhso ugu war-sheegtiyo!"

"Inta dhega-dhegaysiyo  
 in kaloo dhambaslkaba  
 hawadaa ka dhuuxdiyo!"

"Inta sheed ka dhugatiyo  
 inkaloo 'dhab-siisoo'  
 'dhay' la sii tidhaahdaba  
 uga diiday dhibicdeen  
 dhangad kaga dareershiyo!"

"Naftaan dhaanka ugu furey  
wehe, dhay guduudii!"

"Nac dhitaysan iyo Guba  
dhilis laga waraabshoo  
dhegar loo tumaashaday  
dhulaxuma u daab yahay!"

"Oo dhaleeyo hadantiyo  
utum dhoorka loo fidhay  
afka loogu dharayoo!"

"Dhunkaal huursan iyo hoog  
yahay dhaashigeeduna!"

"Oo la soo dhardhaaroo  
dhuun soo xulaysiyo  
dhegaleey ku soo maqan  
nafti aan isaga dhigay!"

"Iyo taan ku dhaatee  
rasaas soo dhacaysiyo  
gaade dhuunta iyo cadow,  
ii dhaafi waayeen  
u ahaa dhufayskiyo!"



"Nafti aan ku dhololeen  
 ku dhaweeyey beerkeen  
 sidi oodi dhacameed  
 kaga deyray dhaxanteen  
 ka xigsaday dhibaata!"

"Dhirti gaaranayd iyo  
 ragi dharsanaayee  
 kolka laysu jilib dhigo  
 dhawr qaad hagoogliyo  
 dhifsan jirey lajeerkiyo  
 hilbehaygi dheelmaday!"

"Dhugucdadi daraadeed  
 ciidda loogu dhababiyo  
 nafta aan u dhiig baxay!"

"Inay tahay dhigeed cuna  
 iyaday dhufaantoo  
 iga dhiibtay warankoo  
 nabar aan ku dhabar jabay  
 dhulka iigu tuurto  
 'dharjac' igaga siisee!"

"Ina Dhidir hadday tahay  
 dhidar, dhidar ma dheeroo

isla dhidarro weeyee  
anna dhidar kalaan ahay  
dhidarraannu wada nahay!"

"Dhuuga, aannu xidhannaa  
dhemmad buu ka tolanyoo  
dhaleecaannu sidanaa!"

"Ma dhaqnee xumaantana  
waan dhitaysanaayoo  
dhankayaga xariirtii,  
sidu yidhi Dhammayskii,<sup>(1)</sup>  
iyadaa ka dhiganoo  
dharka waan ka xulanaa!"

"Xinjir dhiina, oo riba  
iyo xoox dhibcaysiyo  
dhiig baan ku doonaa,  
iyo dheylo hilibkeed  
iyo dheeman iyo luul!"

"Dhunkaal baannu daaqnoo  
shalay baannu dhimanoo  
xalay baannu dhalanoo

---

1) Dibedyaal, oo ah shakhsiyad Maansada Hadraawi  
ku jira, ayaa la xusayaa.

waxa-nahay dhalaanoo  
 dhadhamaannu doonnoo  
 dhira-dhabatadii iyo  
 caanihi dharkaynkee  
 dhulka nala wareejee  
 na dhalaaxay shalayee  
 na wareemay dhuuntee  
 naga hoodhshay dhogortoo  
 dhanaanoo, il-qaadaa  
 noo dhuuntay saakoo,  
~~taawaannu~~ dhimanoo  
 berritaannu dhalanoo  
 Nala-ga-ma dhamaadee,  
 ninki noo dheg-taagow  
 dhafoorkaa ku daaliye,  
 Isma-dhaanto, noo daa!"

"Adiguna dhurwaagow  
 Ina Dhiriq Xangeeyow,  
 dharigaasi, kuu magan!"

"Dhugatada wadheediyo  
 dhaartaad maqlaysoo  
 dhexda xadhigu waa hee?  
 'Dhash' inay ka siisee,  
 Af-ku-dharablihiyow,

Caawo

saddexdaada dhaadheer  
iyo dhugufka gaarka a'  
dhinacyada ka mariyoo  
dharigaasi yuu jabin!"

"Iska dhuro, ka noolow  
micidana ku sii dhawr!"

"Isagoo dhalfiifmiyo  
inuu kala dhacaa daran!" ayuu Sigad  
sheekadii ku soo af-jaray.

Huddaa iyo Waqooyi guntiina, naas dhan  
oo af-cas sankaa sidaa isugu haysa ah, ayaa  
ka soo faltamay. Xaggiyo xeradii ayuu u soo  
dhinacyeeyay. Jeeniguu ku duugay.

Bartay Mujaahidiintu fadhiyeenna, "Maxaa  
looga hindhisay!" iyo "Maanagaa sankaa, ka  
qoryeynay!" baa ka yeedhay.